

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA

الرسمية

OFFICIAL



RASMIGA AH

الجريدة

BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 12aad

Muqdisho, 31 December 2025

Lr.4

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa \$XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA:** Sanaddii waa \$XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa \$XXX Dollar.

Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa \$XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIIS, IWM

BILAHA

DECEMBER

2025

TUSMO

SHARCI LR. 43

SHARCIGA DHISIDDA HAY'ADDA MAALGASHIGA JFS

Taariikh: 15/12/2025

Bog 1

SHARCI LR. 44

SHARCIGA MIISAANIYADDA SANADKA 2026

Taariikh: 27/12/2025

Bog 18

XEER MADAXWEYNE LR. 447

MAGACAABIS NOOTAAYO

Taariikh: 21/07/2025

Bog 211

XEER MADAXWEYNE LR. 478

MAGACAABIS LA-TALIYAHA SARE EE MADAXWEYNAHA J.F.S EE ARRIMAH WADAMADA ISLAAMKA

Taariikh: 03/07/2025

Bog 212

XEER MADAXWEYNE LR. 479

MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA J.F.S EE ARRIMAH WADAMADA CARABTA

Taariikh: 03/07/2025

Bog 213

XEER MADAXWEYNE LR. 480

MAGACAABIS GUDDOOMIYAH XARUNTA ISKU-DUWIDDA IYO HAWLGALLADA WADAJIRKA AH

Taariikh: 20/07/2025

Bog 214

XEER MADAXWEYNE LR. 616

MAGACAABIS NOOTAAYO

Taariikh: 12/12/2025

Bog 215

XEER MADAXWEYNE LR. 617

MAGACAABIS NOOTAAYO

Taariikh: 13/12/2025

Bog 216

XEER MADAXWEYNE LR. 628

MAGACAABIS NOOTAAYO

Taariikh: 27/12/2025

Bog 217



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

SHARCI LR.43

TAARIKH: 15-TA DISEEMBAR 2025

SHARCIGA DHISIDDA HAY'ADDA MAALGASHIGA JFS

MARKUU ARKAY: MADAXWEYNAHA J.F.S,
Qodobka 87^{aad}, Faqradda 1^{aad} iyo Faqradda 2^{aad} ee
Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 82^{aad}, Faqradda 3^{aad} ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90^{aad}, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee
summaddeedu tahay XGGSH/0800/B11/25, ku
taariikheysan 08/12/2025, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin
Sharciga Dhisidda Hay'adda Maalgashiga JFS.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1^{aad}


Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo
oggolaaday Sharciga Dhisidda Hay'adda Maalgashiga.


Qodobka 2^{aad}

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo,
waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.



Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.





JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Hindise Sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Maalgashiga Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya

**Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha XFS
2025**

CUTUBKA 1AAD – HORDHAC

Qodobka 1^{aad}

Magaca Xeerka

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa Sharciga Dhisidda Hay'adda Maalgashiga Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 2^{aad}

Erey Bixin

Xeerkan marka la joogo

“Hay’ad” waxaa loola jeedaa Hay’adda Maalgashiga Soomaaliya.

“Guddi” waxaa loola jeedaa Guddiga Sare ee Hay’adda Maalgashiga Soomaaliya.

“Sumcadda Soomaaliya” waxaa loola jeedaa magaca iyo fahamka caalamiga ah ee laga haysto JFS.

“Golaha Wasiirrada” waxaa loola jeedaa Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 97^{aad} ee Dastuurka JFS.

“Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka” waxaa loola jeedaa micnaha ku qeexan Qodobka 17^{aad} ee Sharcigan.

“Maalgashade Ajnebi ah” waxaa loola jeeda shirkad ama qof ajnebi kaas oo hanti maalgashi ku sameeyay, kana diiwaangashan JFS, waxaa sidoo kale soo gelaya qof Soomaali ah oo maalgashiga ku diiwaangashaday/gashatay dhalasho dal kale.

“Maalgashi” waxaa loola jeedaa adeegsiga hanti ama ra’sumaal lagu aas-aasayo ama lagu ballaarinayo hawl ganacsi, taasi oo laga filayo faa’iido.

“Maalgashade dalka u dhashay” waxaa loola jeeda shirkad ama muwaadin u dhashay JFS kaas oo hanti maalgashi ku sameeyay, kana diiwaangashan JFS.

“Wasiir” waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

“Wasaarad” waxaa loola jeedaa Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.



“Maamulka Hay’adda” Agaasimaha Guud iyo Agaasime Ku-xigeenka ee hay’adda oo lagu magacaabay si waafaqsan Sharcigan.

“Golaha Qaran ee Maalgashiga” waxaa loola jeedaha Golaha lagu dhisay si waafaqsan Qodobka 12^{aad} ee Sharcigan.

Qodobka 3^{aad} **Ujeeddada Sharciga**

1. Ujeeddada Sharcigan waa;
 - a) Dejinta sharci lagu maamulo maalgashiga dalka.
 - b) Dhisidda Golaha Qaran ee Maalgashiga.
 - c) Yagleelidda hay’ad u xilsaaran dhiirigelinta, soo jiidashada, isku duwidda iyo maareynta maalgashiga iyo sare u qaadidda sumcadda dalka.

CUTUBKA 2AAD – DIIWAANGELINTA SHAHAADDADA MAALGASHIGA

Qodobka 4^{aad} **Codsiga Diiwaangelinta Maalgashiga**

1. Maalgashade dalka u dhashay iyo mid ajnebi ahba waa in ay usoo gudbistaan hay’adda maalgashiga codsi diiwaangelin maalgashi, ka hor inta aan laga hawlgalin maalgashiga gudaha JFS.
2. Codsiga diiwaangelinta maalgashiga waxaa diyaarinaya isla markaana dib-u-cegis ku sameyn kara hay’adda maalgashiga waxaana laga heli karaa xafiiska hay’adda.
3. Maamulka Hay’adda Maalgashiga waxaa ay ka dalban kartaa maalgashatada macluumaad iyo xog dheeri ah ka hor inta aana go’aan laga gaarin codsigooda.

Qodobka 5^{aad} **Shuruudaha Diiwaangelinta Maalgashiga**

1. Shuruudaha Diiwaangelinta Maalgashiga waa:
 - a) in shirkadda maalgashiga laga diiwaangeliyay hay’adaha dowladda ee ku shaqada leh.
 - b) in uu soo gudbiyaa codsadihu codsiga diiwaangelinta maalgashiga oo si rasmi ah, dhameystiran loo buuxiyay.
 - c) in xaddiga ra’sumaalka maalgashi ee codsada ah ajnebi ah aanu ka yaraan \$200,000 ama



lacag qalaad oo u dhiganta.

- d) in maalgashigu aanu ka hor imaaneyn ama liddi ku aheyn shareecada Islaamka, dhaqanka Soomaaliyeed, deegaanka iyo amniga qaranka.
- e) in codsaduhu soo bandhigo qorshe deegaanka iyo bulshada haddii mashruucu leeyahay saameyn weyn.

Qodobka 6^{aad}

Mudnaanta Maalgashiga

1. Ka hor ansixinta codsiga diiwaangelinta maalgashiga, Hay'adda maalgashiga waxa ay mudnaanta siineysa maalgashiga;
 - a) U abuuraya Ummadda Soomaaliyeed fursado shaqo isla markaana keenayo aqoon iyo xirfado dalka ku yar.
 - b) Keenayo tiknoolojiyad, farsamo, xirfad casti ah, ama aqoon aan dalka ku badneyn.
 - c) Bixinaya canshuur mug leh, si loo kordhiyo dakhliga gudaha ee JFS.
 - d) Farsameynaya, warshadeynaya, isla markaana qiimo u yeelayo wax-soo-saarka dalka.
 - e) Kor u qaadaya dhoofta wax soo saarka dalka.
 - f) Maalgashiga koronto dhalinta la cusbooneysiin karo (Renewable Energy).
 - g) Caafimaadka iyo daawooyinka.

Qodobka 7^{aad}

Hab-raaca Go'aanka Codsiga Diiwaangelinta

1. Guddiga Sare ee Hay'adda ayaa go'aan ka gaaraya oggolaanshiyaha iyo diidmada codsiyada diiwaangelinta maalgashiga ee qiimihiisu ka yar yahay \$ 100 milyan oo doolar.
2. Haddii codsiga diiwaangelinta maalgashiga uu qiimihiisu gaarayo \$ 100 milyan oo doolar Guddiga Sare ee Hay'addu wuxuu u gudbinayaa Wasiirka si uu ugu gudbiyo Golaha Qaran ee Maalgashiga.
3. Haddii codsiga diiwaangelinta maalgashiga uusan dhameystirney, ama ka hor-imaanayo shuruudaha ku xusan Qodobka 5^{aad} ee Sharcigan, Guddiga Sare ee Hay'adda ayaa go'aan diidmo qoraal ah dib-ugu-celinayo codsiga maalgashadaha soo gudbistay, kuna wargelinayo sababaha soo celinta codsiga muddo 3 maalmood gudaheed oo ah maalmo shaqo.



Qodobka 8^{aad}

Muddada iyo Cusboneysiinta Shahaaddada Maalgashiga

1. Shahaaddada maalgashiga ee lagu qaatay si waafaqsan Sharcigan Qodobbadiisa 5^{aad} & 7^{aad} waxa ay dhaqangal tahay muddo shan (5) sano ah, laga billaabo taariikhda la bixiyay.
2. Haddii ay dhammaato muddada dhaqangalka shahaaddada maalgashiga isla markaana uu maalgashaduhu la kulmo shuruudaha diiwaangelinta maalgashiga, si waafaqsan Sharcigan Qodobbadiisa 5^{aad} & 7^{aad}, waxaa u furan in uu dib-u-cusbooneysiisto shahaaddada maalgashiga muddo shan (5) sano ah.

Qodobka 9^{aad}

Wareejinta Shahaaddada Maalgashiga

Shahaaddada maalgashiga waxa la wareejin karaa marka laga helo Hay'adda Maalgashiga oggolaansho qoraal ah Guddiga Sare ee Hay'adda Maalgashiga.

Qodobka 10^{aad}

Laalidda Shahaadda Maalgashiga

1. Guddiga Sare ee Hay'addu aya laali kara shahaaddada maalgashiga haddii;
 - a) ay caddaato in shahaaddada lagu bixiyay maclumaad aan run aheyn ee uu bixiyay maalgashadaha amaba lagu bixiyay nidaam aan waafaqsaneyn hab-raaca shahaado maalgashi bixinta.
 - b) uu maalgashaduhu buriyay shuruudaha maalgashiga.
 - c) hay'addu waa in ay qoraalka go'aanka laalidda shahaaddada maalgashi u dirtaa maalgashadaha ay khuseyso muddo 30 cisho ah kadib marka la laalo shahaaddada, kuna xusta sababa laalidda.

Qodobka 11^{aad}

Ka Cabashada Go'aamada

1. Qofkii codsado shahaaddada maalgashiga ee loo diido ama kan shahaaddada laga laalayba waxa ay Wasiirka u gudbin kaaan racfaan ku aaddan go'aamada Guddiga ee la xiriira diidmada bixinta ama laalidda shahaddada maalgashiga, muddo ku siman 30 cisho gudahood.
2. Xeernidaamiye ayaa lagu soo saari doona hab-raaca racfaan qaadashada iyo dib-u-eegista



go'aamada Guddiga Sare ee Hay'adda ee la xiriira diidmada bixinta ama laalidda shahaddada maalgashiga.

CUTUBKA 3AAD – GOLAHA QARAN EE MAALGASHIGA

Qodobka 12^{aad}

Dhisidda Golaha Qaran ee Maalgashiga

Iyada oo siyaasiyan muhiimad mug leh la siinayo maalgashiga dalka, sharcigan waxa lagu aas-aasay Golaha Qaran ee Maalgashiga oo ka kooban xubnaha hoos ku xusan.

1. Ra'iisul Wasaaraha Xuukuumadda Federaalka Soomaaliya oo noqonaya Guddoomiyaha Golaha Qaran ee Maalgashiga.
2. Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha oo noqonaya Guddoomiyaha ku xigeenka Golaha.
3. Wasiirka Ganacsiga iyo Warshadaha.
4. Wasiirka Arrimaha Dibadda.
5. Wasiirka Maaliyadda.
6. Wasiirka Shaqada iyo Arrimaha Bulshada.
7. Wasiirka Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada.
8. Guddoomiyaha Bangiga Dhexe ee JFS.
9. Guddoomiyaha Guddiga Sare ee Hay'adda Maalgashiga.
10. Agaasimaha Guud ee Hay'adda Maalgashiga Somaliya, ahna Xoghayaha Golaha Qaran ee Maalgashiga.

Qodobka 13^{aad}

Xilka iyo Awoodaha Golaha Qaran ee Maalgashiga

Xilka iyo Awoodaha Golaha Qaran ee Maalgashigu waa:

1. Soojeedinta Hindisaha siyaasadaha, shuruucda iyo qorsheyaasha maalgashi ee jaangoyneya mashariicda maalgashi iyo qeybaha dhaqaale ee hor-tebinta u leh maalgashiga iyaga oo tix-raacaya warbixinta iyo soo jeedinta hay'adda una gudbiyaan Golaha Wasiirrada Federaalka Soomaliya.
2. Kor-joogtaynta wasaaradaha iyo hay'adaha dowladda ee uu khuseeyo maalgashiga iyo xaqiijinta wadashaqeyntooda.



3. Dhiirigelinta iskaashi dhex mara dowladda iyo maalgashatada si loo horumariyo, isla markaana loo fuliyo siyaasadaha la xiriira maalgashiga dalka.
4. Xallinta khilafaadka iyo is-qabsiga ka dhex dhasha hay'adaha dowladda ee la xiriira maalgashiga, ee lagu xallin kari waayay hay'adaha dhexdooda.
5. U olo-oleynta caalamiga ah ee maalgashiga dalka.

Qodobka 14^{aad} **Kulamada Golaha**

1. Goluhu waxa uu yeelanaya kulamo caadi ah iyo kuwo aan caadi aheyn, oo uu iskugu yeerayo isla markaana guddoominayo Guddoomiyaha Goluhu, kuna qabsoomaya xarunta hay'adda ama meshii kale ee uu Guddoomiyaha Goluhu go'aamiyo.
2. Kulamada Golaha waxa ay ku ansaxayan aqlabiyad fudud 50+1.
3. Kulamada Golaha waa in uu qabsooma sannadkiiba labo (2) jeer ugu yaraan, xaaladaha caadiga ah.
4. Golaha ayaa dejin doona xeer-hoosaadkiisa kaas oo qeexaya dhammaan arrimaha lagama maarmaanka u ah kulamadooda iyo go'aamadooda.
5. Go'aamada Golaha waxaa lagu gaarayaa cod aqlabiyad fudud 50+1, haddii ay sinmaan waxaa kala rajaxaya Guddoomiyaha Golaha.

Qodobka 15^{aad} **Dhisidda Hay'adda**

1. Sharcigan waxaa lagu dhisay Hay'adda Maalgashiga Somaliyeed oo xarunteeda dhexe noqonayso magaalada Muqdisho ee caasimada Dalka waxeyna xarumo/xafiisyo ku yeelanaysaa Dhammaan Caasimadaha Dowlad Goboleedyadda xubnaha ka ah Dowlada Federaalka ee JFS isla markaana noqonaysa hay'ad shaqadeeda u madax bannaan.
2. Hay'addu waxa ay yeelanaysa:
 - a) Shaqsiyad qaanuuneed, shaabbad iyo astaan u gaar ah.
 - b) Awood ay wax ku dacweyso laguna dacweyo.
 - c) Awood ay ku tasarufto isla markaana ku geli karto heshiis ama ka qayb-qaadato macaamil



kale oo kasta, si waafaqsan Xeerka.

Qodobka 16^{aad}
Xilka iyo Awoodaha Hay'adda

Xilka iyo Awoodaha hay'addu waa:

1. In ay ka shaqeyso iskuwidada iyo qaabeynta maalgashiga gudaha, dhiirigelinta, soo jiidashada maalgashiga caalamiga ah iyo sare u qaadidda sumcadda dalka.
2. Hagaajinta jawiga maalgashig dalka si loo ogaado caqabadaha ku gedaaman maalgashiga iyo guud ahaan kobaca dhaqaalaha si loo dhiirigeliyo maalgashiga dalka iyo horumar dhaqaale waara.
3. Sameynta wadatashi ballaaran oo u dhaxeeya dowladda, ganacsatada, ururada rayidka ah iyo hay'adaha caalamiga ah si loo helo talooyin ku aaddan maalgashiga iyo guud ahaan horumarinta dhaqaalaha dalka.
4. Go'aaminta maalgashiga iyo qeybaha (sectors) dhaqaale ee furan (positive list) iyo kuwa xiran (negative list).
5. Ansixinta codsiga diiwaangelinta maalgashiga.
6. In ay ka gacan siiyaan maalgashatada helitaanka adeegyada ay bixiyaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya iyada oo wakiil uga noqoneysa dowladda iyo maalgashatada fududeynta bixinta adeegyada sida.
 - a) Dal-ku-galka/Dal-ku joogga (Visa/Permit)
 - b) Ruqsada Shaqaalaha (Work permit)
 - c) Shatiyada/ruqsadaha Wasaaradaha kala duwan
 - d) Diwaangelinta & wax ka beddelka shirkadaha maalgashatada
 - e) Talo so jeedinta Bixinta canshuur dhaafka maalgashiga

Adeegyada sare ku xusan waxa ay hay'addu ka gacan siineysa maalgashatada kadib marka ay soo buuxiyaan dhammaan shuruudaha Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya ee bixinaya adeegyada si loogu helo oggolaanshiyo iyo adeegyada ay u baahanyihiin maalgashatadu.

7. ay qabato, haysana diiwaanka codsiyada diiwaangelinta maalgashiga.
8. ay bixiso Shahaaddada maalgashiga.
9. ay taageero joogto ah siiso maalgashatada ka dib marka ay yagleelaan maalgashigooda, gudaha dalka, si waafaqsan xeerarka dalka.
10. ay joogtayso uruurinta xog tayaysan oo la xiriirta maalgashiga dalka, iyada oo kaashanaysa



hay'adaha dawladda.

11. ay u ololeyso xeerar, siyaasado iyo xeer-nidaamiyeyaal lagu hagaajinayo, sarana loogu qaadayo maalgashiga dalka.
12. ay ku lahaan karto wakiilo iyo xafiisyo dalka iyo dibadda.
13. ay sare u qaaddo sumcadda iyo muuqaalka dalka JFS.
14. ay dhiirigeliso maalgashiga Aaggaga Dhaqaale ee gaarka/xorta ah.
15. ay dhiirigeliso maalgashiga kheyraadka dabiiciga ah sida shidaalka, gaaska, iyo macdanta noocyadeeda kala duwan.
16. ay diyaarisaa mashariicda qaran ee maalgashiga.

Qodobka 17^{aad}

Xiriirka Hay'adaha Dowladaha Xubnaha ka ah DFS

Hay'addu waxa ay wadashaqeyn joogto ah la yeelaneyso Wasaaradaha iyo hay'adaha dowlahada xubnaha dowladda Federaalka ee uu khuseyo maalgashiga.

Qodobka 18^{aad}

Qaab-dhismeedka Hay'addas

1. Qaab-dhismeedka hay'adda waxa uu koobanyahay;
 - a) Guddiga Sare ee Hay'adda iyo
 - b) Maamulka Hay'adda.

Qodobka 19^{aad}

Xilka iyo Awoodaha Guddiga sare ee Hay'adda

Xilka iyo Awoodaha Guddiga waa in uu:

1. Kor-joogteynta hab-sami u socodka howlaha iyo wax-qabadka Maamulka Hay'adda
2. Jaangooyaa hiigsiga, aragtida, ujeeddada iyo qiyamka asaasiga ah ee Hay'adda.
3. In ay ansixiyaan isla markaana korjoogteeyaan istaraatiijiyadda iyo qorsheyaasha guud ee Hay'adda una gudbiyaan Wasiirka.
4. Ansixiyo qaab-dhismeedka maamulka iyo hay'adda.
5. Ansixiyo miisaaniyadda iyo xisaab-xir sannadeedka Hay'adda una gudbiyo Wasiirka.
6. Ansixiyo ama diida diiwaangelinta/cusbooneysiinta codsiga maalgashiga, si waafaqsan Sharcigan iyo tilmaamaha siyaasadda ee Xukuumadda Federaalka ah iyo shuruudka dalka.
7. Hubiyo u hoggaansanaanta maalgashatada ee shuruudka maalgashiga JFS.



8. Go'aamiya wax ka beddelka shaabbadda iyo Astaanta Hay'adda.
9. Soo saaraan xeer-hoosaadka shaqada Guddiga.
10. Magacaabo Agaasime Waxeedyada Hay'adda, ka dib marka uu helo soo jeedinta Agaasimaha Guud ee Hay'adda oo la tashaday Wasiirka.

Qodobka 20^{aad}

Xubnaha Guddiga Sare ee Hay'adda

1. Guddiga Sare ee Hay'adda waxa uu ka kooban yahay sagaal (9) xubnood, oo lagu soo xulayo si waafaqsan Qodobka 21^{aad} farqaddiisa (b).
2. Agaasimaha Guud ee hay'adda ee lagu magacaabay si waafaqsan Qodobka 30^{aad}, waxa uu xilka uu hayo awgiis ku noqonayaa xog-haynta Guddiga Sare.

Qodobka 21^{aad}

Shuruudaha Xubnaha Guddiga Sare ee Hay'adda

1. Shuruudaha xubnaha Guddiga Sare ee Hay'addu waa in:
 - a) uu yahay muwaaddin Soomaaliyeed oo deegaankiisa rasmiga ahi yahay JFS. Haddii ay lagama maarmaan noqoto, waxaa furan in xubin uu ka noqon karo qof ajnabi ah, haddii sumcad iyo xiriir maalgashi oo calami ah looga maarmi waayo.
 - b) uu aqoon gaar ah u leeyahay mid ka mid ah: dhaqaalaha, sharciga, suuq-geynta, warbaahinta/xiriirka dadweynaha, siyaasadda dowladda, maamulka, horumarinta ganacsiga, maaliyadda iyo qorsheynta dhaqaalaha.
 - c) uu waayo-aragnimo shaqo oo aan ka yareyn shan (5) sano u leeyahay mid ka mid ah aqoonta ku xusan xarafka (b) ee Qodobkan.
 - d) aysan maxkamad ku helin dambi taabanayo sharafta ammaanada.
 - e) uu dhimir ahaan badqabo.

Qodobka 22^{aad}

Hannaanka Magacaabista Guddoomiyaha/Ku-xigeenka iyo Guddiga Sare ee Hay'adda

1. Wasiirku, isaga oo sameynaya wadatashi ballaaran, ayuu usoo jeedinaya Golaha Wasiirada murrashaxiinta Guddiga iyo Guddoomiyaha Guddiga Sare/Ku-xigeenka ee Hay'adda, si



waafaqsan Qodobka 21^{aad} si loo tixgeliyo, loona ansixiyo.

2. Ka dib ansixinta Golaha Wasiirada, Ra'iisul Wasaaraha XFS ayaa u gudbinaya go'aanka ansixinta, Xubnaha Guddiga, Madaxweynaha JFS, si uu ugu soo saaro Xeer Madaxweyne magcaabista isla markaana lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah.

Qodobka 23^{aad}

Xilka iyo Awoodaha Guddoomiyaha Guddiga

1. Xilka iyo Awoodaha Guddoomiyaha Guddiga waa;
 - a) Ku dhawaaqidda, iskugu yeeridda, iyo guddoominta shirarka Guddiga
 - b) Isku xirka hay'adda iyo Golaha Qaranka ee Maalgashiga
 - c) Mas'uuliyadda hoggaaminta, kormeerka iyo kor-joogteynta howlaha Guddiga iyo Guddi
 - d) Hoosaadyada Guddiga si loo xaqiijiyo yoolalka hay'adda.
 - e) Ilaalinta maamul wanaagga iyo ku dhaqanka xeer-hosaadka guddiga.
 - f) Xaqiijinta wadashaqeyn iyo xiriir hufan in uu ka dhaxeeyo Guddiga iyo Maamulka Hay'adda.
 - g) Kala rajax aadda haddii uu codadku sinnado.
 - h) U Gudbinta go'aannada Guddiga jihooyinka ay khuseyan.

Qodobka 24^{aad}

Muddo-xileedka iyo Waayidda Xilka Guddoomiyaha

1. Si waafaqsan Qodobka 25^{aad} ee Sharcigan, muddo xileedka Guddoomiyaha Guddigu waa Shan (5) sano ah oo halmar loo cusbooneysiin karo.
2. Guddoomiyaha Guddiga waxa uu ku waayi karaa xilka marka uu;
 - a) si rasmi ah qoraal is-casilaad ah u gudbiyo Wasiirka, lagana aqbalo.
 - b) geeriyoodo.
 - c) uu gaaro/gaarto da'da howl-gabka.
 - d) waayo mid-ka-mid ah shuruudihii lagu soo magacaabay.

Qodobka 25^{aad}

Muddo-xileedka iyo Waayidda Xubinnimada Guddiga Sare ee Hay'adda

1. Xubnaha Guddiga Sare ee Hay'addu waxa ay xilka haynayaan muddo shan (5) sano ah oo halmar loo cusbooneysiin karo.



2. Xubinnimada Guddiga Sare ee Hay'adda waxa lagu waayi karaa marka uu;
 - a) Si rasmi ah qoraal is-casilaad ah u gudbiyo Guddoomiyaha Guddiga, lagana aqbalo.
 - b) Geeriyoodo.
 - c) Waayo mid-ka-mid ah shuruudihii lagu soo magacaabay, si waafaqsan Qodobka 22^{aad}.

Qodobka 26^{aad}

Kulamada, Guntanka iyo Codaynta Guddiga Sare ee Hay'adda.

1. Guddiga waxa uu yeelanaya kulamo caadi ah iyo kuwo aan caadi aheyn oo ku qabsoomaya xarunta hay'adda ama meshii kale ee uu Guddoomiyaha Guddigu go'aamiyo.
2. Kulamada Guddiga waxa ay ku ansaxayan marka ay xaadiraan Seddex meelood oo Labo (2/3). Haddii la waayo 2/3, kulanka xiga waxa uu ku qabsoomaya aqlabiyad fudud 50+1.
3. Kulamada Guddiga waa in uu qabsooma sannadkiiba afar jeer ugu yaraan, xaaladaha caadiga ah.
4. Guddiga ayaa dejin doona xeer-hoosaadkiisa kaas oo qeexaya dhammaan arrimaha lagama maarmaanka u ah kulamadooda iyo go'aamadooda.
5. Go'aamada Guddiga waxaa lagu gaarayaa cod aqlabiyad fudud 50+1.

Qodobka 27^{aad}

Xuquuqda Xubnaha Guddiga Sare ee Hay'adda

Xubnaha Guddiga waxa ay yeelanayaan gunno lagu jaan-goohnayo fadhiyada Guddiga oo uu go'aamiyo Wasiirku.

Qodobka 28^{aad}

Mabaadi'da Maamul Wanaagga

1. Guddiga waa in uu mabaadii'da maamul wanaagga hay'adeed ku dabbqaan Hay'adda, waana inay xaqiijiyaan in marka ay qabanayaan hawlaha la xiriiira Hay'adda ay;
 - a) u dhaqmaan si xilkasnimo leh iyaga oo tixgelinaya waajibaadkooda masuulnimo;
 - b) aanay u dhaqmin qaab keenaya cabashooyin la xiriiira iska horimaad dhanka danta ah; iyo
 - c) inay si degdeg ah ugu dhawaaqaan arrin kasta oo ay og yihiin taasi oo wax u dhimi karta awoodooda inay si daacadnimo ah u gutaan xilkooda si waafaqsan Xeerka.



Qodobka 29^{aad}
Maamulka Hay'adda Maalgashiga

Maamulka Hay'adda waxa uu ka koobanyahay Agaasimaha Guud, Ku-xigeen, Agaasime Waaxyo, Madax Qaybeedyo iyo Shaqaale hoosaad, si waafaqsan Sharcigan iyo Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dawladda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 30^{aad}
Hannaanka Magacaabista Agaasimaha Guud iyo Agaasime Ku-xigeenka Hay'adda.

Agaasimaha Guud iyo Agaasime Ku-xigeenka waxaa lagu soo magacaabayaa iyadoo la raacayo Qodobbada 21^{aad} iyo 22^{aad} ee Sharcigan, iyo si waafaqsan Xeerka Shaqaalaha Rayidka ah.

Qodobka 31^{aad}
Xuquuqda Agaasimaha Guud iyo Agaasime ku Xigeenka ee Hay'adda

Mushaarka iyo gunnooyinka Agaasimaha Guud, iyo Agaasime Ku-xigeenka waxaa lagu jaangoynayaa xuquuqda saraakiisha dowladda ee shaqaalaha rayidka.

Qodobka 32^{aad}
Xilka Agaasimaha Guud ee Hay'adda

1. Agaasimaha Guud waa in;
 - a) uu masuul ka noqdaa maamulka Hay'adda ee maalinlaha ah.
 - b) uu hoggaamiyo, kor-joogteeyo waaxyaha iyo shaqaalaha kala duwan ee Hay'adda;
 - c) diyaarinta iyo fulinta miisaaniyadda, istaraatiijiyadda iyo hab-raacyada maamul ee hay'adda.
 - d) xaqiijiyo in Hay'addu yeelato qaab-dhismeed maamul oo wax-ku-ool ah iyo qorshe kala-guur;
 - e) isku xiro Maamulka Hay'adda, Guddiga Sare iyo Wasaaradda.
 - f) uu u yahay xog-hayaaha Golaha Qaran ee Maalgashiga
 - g) xaqiijinta, kor-joogteynta iyo habsami u socodka howlaha maamulka iyo maaliyadda hay'adda
 - h) fulinta dhammaan go'aamada Golaha Qaran ee Maalgashiga iyo Guddiga Sare ee Hay'adda, iyo waajibaadkii kale ee ay u xilsaaran, sida bixinta shahaaddada maalgashiga iyo laalideedaba.
 - i) Matalaadda hay'adda marka ay la galeyso hay'ado kale oo dhiggeeda ah, halka Wasiirka Wasaaraddu gelayo heshiisyada labo-geesoodka (bilateral) ah iyo kuwa dhinacyada badan



(multilateral).

- j) U gudbiyaa Wasiirka warbixin sanadkiiba laba mar iyo mar kasta oo uu ka dalbado Wasiirka.

Qodobka 33^{aad}

Waayidda iyo Muddo Xilka Agaasimaha Guud iyo Agaasime Ku-xigeenka Hay'adda.

1. Agaasimaha Guud iyo Agaasime Ku-xigeenka hay'adda waxa ay xilka hayn karaan mddo shan (5) sano ah waxaana loo cusbooneysiin karaa mar kale.
2. Agaasimaha Guud iyo Ku-xigeenkiisa, inta aysan dhammaan mudada xil-hayntooda waxa ay ku waayi karaan xilka xafiiska haddii;
 - a) Si rasmi ah qoraal is-casilaad ah ugu gudbiyo Guddiga Sare ee Hay'adda, lagana aqbalo.
 - b) Geeriyoodo.
 - c) Uu gaaro/gaarto da'da hawl-gabka.
 - d) Guddiga Sare ee Hay'adda soo jeediyo xil ka-qaadis, Wasiirka iyo Golaha Wasiiraduna ay ku qancaan soo-jeedinta Guddiga Sare.
 - e) Waayo mid-ka-mid ah shuruudihii lagu soo magacaabay.

Qodobka 34^{aad}

Shaqaalaha Hay'adda

Hay'addu waxay shaqaalaysiin kartaa shaqaale cusub iyada oo lagu saleynayo qaab-dhismeedka hay'adda iyo baahiyaha taagan, waxaana loo raacaya Xeerka Shaqaalaha Rayidka ee Dawladda.

CUTUBKA 4AAD – ARRIMAHA MAALIYADEED

Qodobka 35^{aad}

Misaaniyadda iyo Ilaha Dhaqaale ee Hay'adda

1. Hay'adda waxa ay qoondo miisaaniyadeed sannadle ah ku yeelanaysaa miisaaniyadda qaranka.
2. Hay'addu waxa ay boqolkiiba hal (1%) ku yeelanaysaa faa'iidada maalgashiga ajaanibta, taas oo uu hirgelin doonaan hay'adaha ay khuseyso.
3. Hay'addu waxa ay ku yeelanaysaa xisaab rasmi ah Banigaga Dhexe ee JFS, waxa ayna koonto bangi oo dheeraad ah ku yeelan kartaa bangiyada gaarka loo leeyahay.



Qodobka 36^{aad}

Xisaabaadka

1. Hay'addu waa inay leedahay buug xisaabeed iyo diiwaan sax ah oo la xiriira dakhliga maaliyadeed iyo kharashka, kaasi oo la jaanqaadaya hannaanka xisaabaadka maaliyadda dowladeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Waa in xisaabaadka hay'adda oo sax ah isla markaana dhammaystiran sannad walba hay'addu u gudbisa hantidhawrka dowladda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
3. Ka dib xisaabaadka hantidhawrka maray ee sannadka oo uu soo ansixiyay hantidhawruhu, Guddigu waa inay xaqiijiyaan in xisaabaadkaas la daabaco oo ay dadweynuhu ku heli karaan saddex bilood gudahood ka dib ansixinta.
4. Sannad xisaabeedka Hay'adda waxa uu lamid yahay sannad maaliyadeedka Dowladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 37^{aad}

Ku takri falka Hantida Hay'adda

1. Dhaqaalaha iyo hantida Hay'addu waa hanti dadweyne, waana in loo adeegsado si taxaddar leh iyada oo la tixgelinayo mabaadi'da maaliyadda dowladeed ee ku dabbaqmaya xafiisyada dowladeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Marka lagu ogaado hannaan cadaaladeed in Guddiga, xubin kamid ah, ama sarkaal ka tirsan Hay'adda uu si aan habboonayn u isticmaalay dhaqaalaha, hantida ama khayraadka Hay'adda, tallaabo anshax-marin iyo ciqaab ayaa laga qaadanayaa si waafaqsan shuruudda Xeerka ee ku aaddan ciqaabta falkan isdabamarin ee noocan oo kale ah.

CUTUBKA 5AAD – QODOBBO KALA DUWAN

Qodobka 38^{aad}

Baabi'in

Waxaa halkan lagu baabi'iyay Sharciga Maalgashiga Shisheeye ee 2015.



Qodobka 40^{aad}
Dambiyada iyo Ciqaabaha


Qofka kasta oo si ulakac ah u gudbiya maclumaad uu ku marin-habaabiya hay'adda si uu u diiwaangeliyo maalgashi ama u helo adeegyada hay'adda waa dambiile waxaana lagu ganaaxaya, ganaax aan ka badneyn lacag u dhiganto seddex kun iyo shan boqol doolar (\$3,500) ama xarig aan ka badneyn seddex sano iyo badh ama labadaba.

Qodobka 41^{aad}
Xeer-nidaamiyeyaasha

Wasiirku waxa uu soo saarayaa xeer-nidaamiye lagu dhaqan-galiyo Sharcigan.

Qodobka 42^{aad}
Dhaqan-gal

Sharcigan wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya uuna saxiixo Madaxweynaha JFS, isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.





FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

SHARCI LR.44

TAARIIKH: 27-DA DISEEMBAR 2025

SHARCIGA MIISAANIYADDA SANADKA 2026

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad}, Faqradda 1^{aad} iyo Faqradda 2^{aad} ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Qodobka 82^{aad}, Faqradda 3^{aad} ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Qodobka 90^{aad}, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.
MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay GSH/0808/B11/25, ku taariikheysan 23/12/2025, ujeeddaduna tahay Sharciga Miisaaniyadda Sanadka 2026.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la meel mariyo sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1^{aad}


Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Sharciga Miisaaniyadda Sanadka 2026.

Qodobka 2^{aad}

Waxa uu sharcigan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.



Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



**XEERKA QOONDAHA MIISAANIYADDA
2026-KA**

TIRSI 00026

HALKU-DHIGGA SANNADKAN 2026-KA

**“KU TIIRSANAANTA AWOODDEENA
DAKHILI”**

TUSMADA BUUGGA

1. Cutubka 1^{aad} Guud Ahaan	22
1.1 Qodobka 1 ^{aad}	22
1.2 Qodobka 2 ^{aad} Ereybixin	22
1.3 Qodobka 3 ^{aad} Miisaaniyadda La Qoondeeyey.....	23
2 Cutubka 2^{aad} Maamulka Miisaaniyadda	23
2.1 Qodobka 4 ^{aad} Awoodaha Xafiisyada Dowladda Federaalka Soomaaliya	23
2.2 Qodobka 5 ^{aad} Miisaaniyad Wareejin.....	24
2.3 Qodobka 6 ^{aad} Miisaaniyad Wareejin Xafiiska Dhexdiisa	24
2.4 Qodobka 7 ^{aad} Miisaaniyad Wareejinta Xafiisyada Dhexdooda	24
2.5 Qodobka 8 ^{aad} Wareejinta Miisaaniyadda Kaydka	24
2.6 Qodobka 9 ^{aad} Ku-noqoshada Miisaaniyadda	25
2.7 Qodobka 10 ^{aad} Gashibaxa/Qaan Bax	25
2.8 Qodobka 11 ^{aad} Qaamaha	25
2.9 Qodobka 12 ^{aad} Isticmaalka SDR Ee Wasaaradda	25
3 Cutubka 3^{aad} Kharash Bixin.....	26
3.1 Qodobka 13 ^{aad} Mudnaanta Kharash Bixinta	26
3.2 Qodobka 14 ^{aad} Dhito	26
3.3 Qodobka 15 ^{aad} Lacagta Laga Bixiyo Miisaaniyadda Duuduubka	27
3.4 Qodobka 16 ^{aad} Xaddiga Kharash Bixinta	27
3.5 Qodobka 17 ^{aad} Gedab	28
3.6 Qodobka 18 ^{aad} Lacag Bixinta Agabka iyo Adeegga	28
3.7 Qodobka 19 ^{aad} Lacagta aan la Istic-maalin	29
3.8 Qodobka 20 ^{aad} Dhacitaanka Qoondooyika Dhamaadka Sanad Xisaabeedka	29
3.9 Qodobka 21 ^{aad} Maamulka Deeqaha Maamul Goboleedyada	29
3.10 Qodobka 22 ^{aad} Warbixin Xisaabeedka	30
4 Cutubka 4^{aad} Qoondaynta Miisaaniyadda.....	30
4.1 Qodobka 27 ^{aad} Qoondaynta Miisaaniyadda Xafiisyada Dowladda	30
4.2 Muddada Dhaqan-galka	30
5 Lifaayada Miisaaniyadda Sanadka 2026-ka	30
5.1 Soo Koobidda Dakhliga iyo Kharashka Miisaaniyadda sanadka 2026-ka	31

5.2	Faah-faahinta Dakhliga Guud Dowladda Ee Miisaaniyadda sanadka 2026-ka	33
5.3	Qoondada Hay'adaha Ee Miisaaniyadda sanadka 2026-ka	36
5.4	Soo Koobidda Wadarta Guud Ee Miisaaniyadda sanadka 2026-ka (US\$)	41
5.5	Faah-Faahinta Miisaaniyadda Guud Ee Sanadka 2026-ka Ee Hay'adaha Dowladda.....	45
5.6	Faah-Faahinta Qoondada Hay'adaha Dowladda Ee Miisaaniyadda 2026-ka	113
5.7	Faah-Faahinta Miisaaniyadda Mashaariicda Ee sanadka 2026-ka	166
5.8	QORSHAHA SANADLAHA AH EE AMAHASHADA QARANKA EE SANADKA 2026	201
5.9	HANNAANKA DAMMAANADQAADYADA AAN DEYNTA KU-SABSANAYN: DAMMAANADQAADYADA DALBASHADA DEGDEGGA AH (DEMAND GUARANTEE)	205

1. Cutubka 1^{aad}

Guud Ahaan

1.1 Qodobka 1^{aad}

Xeerkan waxaa lagu magacaabay “Xeerka Dhaqangelinta Miisaaniyadda sanadka 2026-ka ee tirsi 00026/2025”

1.2 Qodobka 2^{aad} Ereybixin

Haddii aan si kale loogu fasirin xeerkan dhexdiisa, ereyada soo socda waxay yeelanayaan macnaha mid walba ku hor qeexan: -

1. “Xariiqda-Sare” waxaa loola jeedaa dhacdo maaliyadeedka saameynta ku leh hadhaaga lacagaha cadaanka ah”
2. “Qoondayn” waxaa loo la jeedaa amar kasta oo uu Labada Aqa lee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ku amrayo in lacag laga bixiyo Miisaaniyadda duduubka ah.
3. “Ansixin” waxaa loo la jeedaa oggolaanshaha uu ogolaado wasiirku, Miisaaniyadda ku diyaarsan walax kharasheedka qaab wafaqsan qoondo Miisaaniyadeedka uu Labada Aqa lee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya Ansixiyey.
4. “Isticmaalka Agabka Hantida” waxaa loo la jeedaa kharashka lagu bixiyo iibka iyo dayactirka hantida joogtada ah, oo ay ku jiraan kharashyada ay ka mid yihin kuwa tababarada iyo adeegyada latalinta.
5. “Gedab “waxaa loo la jeedaa waajibaadka noqonaya qaan hadiiba ama marka shuruudaha heshiis jiray ama sharci la fuliyo.
6. “Wasiir ama wasaarad” waxaa loo la jeedaa wasiirka maaliyadda ama wasaaradda maaliyadda hadba sida ay tahay.
7. “Xafiis dawladeed” waxaa loo la jeedaa xafiis kasta oo ka mid ah Dowladda Federalka Soomaaliya oo guud ahaan ama qayb-ahaan looga qoondeeyo miisaaniyadda Dowladda ee xeerkan lagu xeeriyay.
8. “Kala wareejin” waxaa loola jeedaa oggolaanshaha kala warejinta Miisaaniyadda la qoondeeyey, lagana wareejiyo cinwaan, farac cinwaan mashruuc ama walax kharasheed laguna wareejiyo mid kale.
9. “Qaansheegatada” waxaa loola jeedaa shirkadaha ama shaqsiyaadka hay’adaha dowladda siiya adeeg ama agab.
10. “Xariiqda-Hoose” waxaa loola jeedaa haraaga dib u bixinta qaamaha looma diiwaangaliyo dakhli ama kharash balse waxaa loo adeegsan karaa iyo lagu dheel tiro faraqa xisaabta dowladda, waxaana loo yaqaan dhacdo maaliyadeedka xariiqda-hoose, taa waxaa ka soo horjeeda Xariiqda-Sare taasoo loo adeegsado

dhacdooyinka maaliyadeed ee saameynta ku leh haraaga lacagta (Dakhli ama Kharash).

11. “SDR” waxaa loola jeedaa lacagta ay isticmaasho hay’adda lacagta aduunka (IMF) waxaana laga soo gaabiyey Special Drawing Rights.
12. “IMF” waxaa loola jeedaa Hay’adda Lacagta Aduunka, waxaana laga soo gaabiyey International Monetary Fund.
13. “SFMIS” waxaa laga soo gaabiyey Somali Financial Management Information System.
14. “Raasumaalka” waxaa loola jeedaa kharashaadka la xidhiidha arrimaha horumarinta sida maalgalinta iyo iibsiga hantida, looma adeegsan karo kharashaadka la xidhiidha adeegga xafiisyada.

1.3 Qodobka 3^{aad} Miisaaniyadda La Qoondeeyey

Miisaaniyadda Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa si ay u meel-mariso hawlaha u qorshaysan Sanad misaaniyadeedka ka billaabma 1-da Janaayo 2026-ka kuna dhamaada 31, December 2026-ka, ayaa sida hoos ku xusan looga qoondeeyay dakhliga khasnadda iyo lacagaha kale ee Dowladda, sida lagu qeexay jadwalkan. Wadarta Miisaaniyadda ee loo qoondeeyey Miisaaniyadda Joogtada iyo tan Raasumaalka ah ayaa ah sidan hoos ku xusan: -

B) Kharashka Joogtada ah	US 682,388,785
T) Kharashka Raasumaalka ah	<u>US 704,418,458</u>
Wadarta Guud Ee Miisaaniyadda	US\$ 1,386,807,242

2 Cutubka 2^{aad} Maamulka Miisaaniyadda

2.1 Qodobka 4^{aad} Awoodaha Xafiisyada Dowladda Federaalka Soomaaliya

1. Wasiirka maaliyadda waxaa loo Awood siiyay in uu fasaxo una qaybiyo dakhliga Dowladda Soomaaliya iyo lacagaha kaleba, cadadka halkan loogu qoondeeyay xafiisyadooda marka ay soo codsadaan mas’uuliyiinta xafiisyada Dowladda Federaalka Soomaaliya ee ay khusayso, si ay hawlahooda ugu fushadaan.
2. Xafiisyada Dowladda waxaa loo awood siiyay in ay diwaan-galiyaan ciwaanka Miisaaniyadda la qoondeeyey, farac ciwaanka, mashruuca ama barnaamijyada xafiisyada, kolba kuu yahay. Waana inuu talaabada lagama-maarmaanka ah ka qaataa adeegsiga deynta ama deeq kasta oo dheerada, haday tahay mood ama lacag oo laga helo illaha gudaha ama dibadda looguna talagalay fulinta miisaaniyadda mashariicda ama miisaaniyadda joogtada ah. Sidoo kale, waxa lagama maarmaan ah in bil ka hor dhammaadka sannad miisaaniyadeedka loo gudbiyo warbixin Wasaaradda.

2.2 Qodobka 5^{aad} Miisaaniyad Wareejin

1. Miisaaniyadda Joogtada ah waxaa loo wareejin karaa Miisaaniyadda Mashaariicda.
2. Miisaaniyadda Mashaariicada looma wareejin karo Miisaaniyadda Joogtada ah.

2.3 Qodobka 6^{aad} Miisaaniyad Wareejin Xafiiska Dhexdiisa

1. Wasiirku wuxuu xafiis dhexdiis: -

B. Kala wareejin karaa kharashka Miisaaniyadda joogtada ah walax walax haddii ay isku madax yihiin

T. Ka wareejin karaa Miisaaniyadda mashruuc kuna wareejin karaa mashruuc kale.

2. Wasiirku wuxuu u xilsaari karaa mas'uulka xafiiska Dowladda ee ku habboon oo ka tirsan Wasaaradda Maaliyadda in uu meel-mariyo ama fuliyo xilka iyo Awoodda lagu siiyay faqradda 1^{aad} ee qodobkan.

2.4 Qodobka 7^{aad} Miisaaniyad Wareejinta Xafiisyada Dhexdooda

1. Wasiirku wuxuu wareejin karaa Miisaaniyadda joogtada ah ee loo qoondeeyay xafiis dawladeed in loo wareejiyo xafiis kale, kadib marka la xaqiijiyo in xafiiska loo qoondeeyay Miisaaniyadda aanu wada istic-maali karaynin Miisaaniyadaas si waafaqsan Qodobka 33(2) ee sharciga maareynta Maaliyadda Lr. 17 December 25, 2019.
2. Wasiirku wuxuu amri karaa in Miisaaniyadda Mashaariicda ee loo qoondeeyay xafiis, loo wareejiyo mashruuc xafiis kale. Kadib marka la xaqiijiyo in Miisaaniyad yaraanta xafiiska laga dabooli karo miisaaniyad mashaariic oo loo ansixiyey sanadkaas xafiis kale oo dawladeed si waafaqsan Qodobka 33(2) ee sharciga maareynta Maaliyadda Lr. 17 December 25, 2019.

2.5 Qodobka 8^{aad} Wareejinta Miisaaniyadda Kaydka

1. Wasiirku wuxuu amri karaa in Miisaaniyadda kaydka loo wareejiyo loona istic-maalo kharash deg-dega ah kadib marka ay dhacaan hawlo gurmada deg-deg ah, oo uu baahan kharash deg-deg ah, oo aan baahidoodu horay u muuqanin wakhtiga la diyaarinayay Miisaaniyadda sanadka. Kolka uu wasiirka ansixiyo soo wareejinta kharashka kaydka kabidda waxaa lagu wareejinayaa hay'adda ka mas'uulka ah. Wasiirka ayaa si joogta ah u siin doona Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya warbixin ku aadan kharashka laga wareejiyey kaydka kabidda.

2.6 Qodobka 9^{aad} Ku-noqoshada Miisaaniyadda

Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayagoo ka duulaya tala bixinta golaha fulinta ayuu meel mariyaa Miisaaniyadda ku celiska ah.

2.7 Qodobka 10^{aad} Gashibaxa/Qaan Bax

Gashibaxa iyo Amaahda sharciyeysan ee laga dhaxlay Miisaaniyadda 2025-ka ayaa noqoneysa gashibax u gudbeysa Miisaaniyadda sanadka 2026-ka, waxayna noqoneysaa qeyb ka mid ah mudnaanta kharashka, Wasiirka ayaa u xilsaaran xaqiijinta dhamaan qaamaha iyo gashibaxa kuwooda sharciga ku qotoma iyo kuwa hareer marsan.

2.8 Qodobka 11^{aad} Qaamaha

1. Wasiirka oo kaliya ayaa awood u leh amaahda Gudaha iyo dibadda lagu qaadayo magaca dowladda federaalka ah asagoo raacaya habraacyada iyo shuruudaha lagu qeexay qodobka 35^{aad} iyo 36^{aad} ee sharciga maareynta maaliyadda Lr. 17 December 25, 2019.
2. Dowladda Federaalka Soomaaliya ma gali karto wax qaan ah gudaha ama dibadda marka laga reebo wadiiqadaha SDR (Special Drawing Rights) ee Hay'adda Lacagta Aduunka "IMF" lagula jiro, Qaamaha fudud (concensional loan) iyo lacago horumaris yar yar ee laga amaahdo banka dhexe ee soomaaliya ayna tahay in lagu bixiyo isla sanad Miisaaniyadeedka gudihiisa.
3. Dhaqaalaha ka yimaada deymaha waxaa lagu diiwaangalinayaa xariiqda-hoose ee xisaabaadka (Below-the-line transactions), dhaqaalaha noocaas ah looma aqoonsan doono dakhli ama Kharash.
4. Bixinta dulsaarka deymaha waxaa lagu diiwaan galin doonaa xariiqda-sare xisaabaadka (above the line transactions) qaab Kharash ah.

2.9 Qodobka 12^{aad} Isticmaalka SDR Ee Wasaaradda

1. Si waafaqsan Qodobka 8^{aad} iyo faqradiisa 3^{aad} ee sharciga maareynta maaliyadda, Wasiirka ayaa mas'uul ka ah maamulka, hantida iyo qaamaha la xidhiidha isticmaalka lacagta SDR (special Drawing Rights).
2. Si looga fogaado hubanti la'aan waxaa halkan lagu qeexayaa: -
 - a) Hantida iyo qaamaha la xidhiidha lacagta SDR ee Wasaaradda waxaa iska leh Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya mana noqon karto qeyb ka mid ah hantida ama qaamaha Banka Dhexe Ee Soomaaliya;
 - b) Qaanta dulsaarka ee ku waajibtay qoondada Wasaaradda waxaa lagu leeyahay dowladda federaalka ah Soomaaliya, lagumana dalacayo SDR uu hayo Banka dhexe ee Soomaaliya
3. Wasiirka waxa uu u isticmaali karaa lacagta SDR ee Wasaaradda kaliya kharashaadka mudnaanta lagu siiyey Qodobka 13^{aad} marka ay timaado hoos u dhac dakhli;

4. Haraaga lacagta SDR ee Wasaaradda la siiyey kama yaraan karto 3 malyan ee unit-ka SDR.
5. Wasiirka wuxuu ka habeynayaa dulsaarka qoondada haraaga Wasaaradda ee SDR-ka marka loo baahdo in la maareeyo cadadka kor lagu xusan faqrada 4^{aad} ee Qodobkan.
6. Waa in lagu lifaaqaa xisaab xirka sanadlaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya lifaaq sharaxaya haraaga taagan ee lacagta SDR-ka iyo qoondada u harsan Wasaaradda iyo isbadal kasta oo dhaca inta lagu guda jiro sanad maaliyadeedka.

3 Cutubka 3^{aad} Kharash Bixin

3.1 Qodobka 13^{aad} Mudnaanta Kharash Bixinta

Haddii ay timaado hoos u dhac dhanka dakhliga ama deeqaha wasaaraduna fulin weyso dhamaan kharashaadkii loogu talagalay Miisaaniyadda sanadka 2026-ka, waxaa mudnaanta bixinta kharashka loo raacayaa sida ay u kala horreyaan ee hoos taxan.

1. Raashinka iyo Gunnooyinka Ciidamada qalabka sida;
2. Khidmadaha Maaliyaddu ku shaqeyso (Khidmadda Banka, Dulsaarka iyo Qaamaha);
3. Mushaarooyinka/gunnooyinka Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowladda;
4. Gunnada Xildhibaanada Labada Aqal ee BJFS iyo G/Wasiirada;
5. Mushaharka iyo gunnooyinka Gashibaxa ku jira ee kasoo wareegay miisaaniyada sanadkii hore ee 2025;
6. Adeegga iyo Agabka Xafiisyada Dowladda federaalka iyo Dowlad Goboleedyada;
7. Gashibaxa Alaabta iyo Qaamaha la hormarsaday

3.2 Qodobka 14^{aad} Dhito

1. Dhakhliga iyo Deeqaah Dowladda Federalka Soomaaliya hesho waa in la dhigaa Khasnadda Dhexe ee Dowladda Soomaaliya 24 saacadood gudahooda oo ka bilaabanaysa marka la qabtay, haddii aysan ku soo aadin maalin aan la shaqaynaynin oo leh tixgelinteeda waqti.
2. Bangiga dhexe ee Soomaaliya waa in uu aqbalaa qabashada dakhliga dawladda, islamarkaana uu meel-mariyo kharash bixinta isagoo isticmaalaya xisaabta Dowladda Federalka ah ee bankiga ka furan.

3.3 Qodobka 15^{aad} Lacagta Laga Bixiyo Miisaaniyadda Duuduubka

1. Iyada oo aanu Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ogolaan, wax kharash ah lagama bixin karo Miisaaniyadda duuduubka ah.
2. Lagama gali karo kharash ama gedab Miisaaniyadda la ansixiyey, ka hor inta aanu ogolaan ama qoondayn wasiirku.
3. Dhamaan bixinta qorsheysan waa in ay si toos ah oga baxdaa khasnadda dhexe una aadaa qaansheegatada ayadoo mareyn hay'adaha adeegga ama agabka la siiyey.
4. Dhamaan qabashada iyo bixinta lacageed ee miisaaniyadda waa in ay martaa habxisaabeedka dowladda (SFMIS) si elektroonik ah, ka dibna la waafajiyaa warbixin xisaabeedka Bangiga Dhexe ee Soomaaliya.
5. Dhamaan bixinta qaansheegatada iyo qandarasleyaasha waa in ay martaa barnaamij xisaabeedka dowladda (SFMIS), lagana bixiyaa madax iyo madax-xigeenada ku haboon ee khasnadda dhexe ee dawladda si toos ah uu u qaato qofka iyo shirkadda qaansheegtada ah.
6. Haddii hay'ad loo sameeyo hormaris lacageed sababo la xidhiidha kharash maamul, horumariska waxaa loo diiwaangalinayaa sida hanti la bixiyey, ka dibna waa in la kharash gareeyo. Lama fasixi karo hormaris kale ayadoo la kharash gareyn kii hore.
7. Si loo kharash gareeyo hormariska lacageed ee taagan dhamaan hay'adaha dowladda waa in ay u keenaan Wasaaradda xogaha iyo xaashiyaha biilasha iyadoo la socoto dalab kharash gareyn si kharash kasta loogu diiwaangaliyo madax xigaha ku haboon.
8. Marka ay timaado ama dhacaan xaalado deg deg ah ee la xiriira musiibooyinka cimilada una baahan falcelin deg deg ah, ayaa waxaa loogu talgalay mashruuc la magac baxay "Barnaamijka Ka-Jawaabista Xaaladaha Masiibooyinka Cimilada (CERP)". Sidaa darteed waxaa la jideynayaa isticmaalidda qoondada mashaariicda qadar aan ka badneyn 10% maalgalinta qorsheysan ee mashaariicda uu maalgaliyo banka aduunka. Dhaqagalinta ama isticmaalka mashruucan wuxuu ku xiran yahay ku dhawaaqid rasmi ah ee xaalad deg deg ah.

3.4 Qodobka 16^{aad} Xaddiga Kharash Bixinta

1. Marka laga reebo sida ku xusan qodobada 5^{aad} ilaa 8^{aad}, ma jirto hay'ad kharash gareyn karta sanadka gudihiisa in ka badan qoondada loogu qoondeeyey xeerkan ee sanadka 2026.
2. Wasiirka ayaa qeexi doona lacagaha gacan ku haynta ah, hadhaaga xisaab kasta waxay ku jaan go'naan doonta xadiga Wasiirka jaangooyo.

3.5 Qodobka 17^{aad} Gedab

1. Wax gedab ah lagama gali karo qoondaha, kaliya inuu soo codsado Mas'uulka xafiiska Dowladda ama cid uu qoraal ku wakiishay kaliya.
2. Madax kasta oo xafiis dawladeed magali karo heeshiis ama nidaam kale oo uu baahan kharash, kaliya marka ay jirto hadhaa aan qaan ahayn oo ku filan in ay daboosho deynta lagali doono sanad miisaaniyadeedka 2026.
3. Waxaa reeban galidda gedab la xidhiidha iibsiga agab iyo adeeg ee hay'adaha dowladda iyadoo ogolaansho hore laga heysan Wasaaradda, marka laga reebo biximaha la xidhiidha gashibax ka soo wareegay sanadihii hore ee ku diiwaangashan buugta hay'adaha dowladda.
4. Iyadoo la raacayo faqrada 1^{aad} ee qodobkan, marka ay timaado dhameystir heshiis muddo dheer ee la xidhiidha mashruuc xilligiisu ka badan yahay sanad miisaaniyadeedka, hubinta qoondada miisaaniyadeed ee looqoondeeyey mashuurcaas ayaa ku filanaan doonta.
5. Sargaalka idman ee dowladda waa in ay marka hore ka helaa ogolaasho wasiirka inta aan la sameyn gedab mudadeedu ka badan tahay sanad maaliyadeedka.
6. Wasaaraddu waxay aasaasi doontaa habraaca la raaco iyo hab diwaaneed qoraya dabagalka gedebka maaliyadeed ee walax miisaaniyadeed kasta.
7. Madaxa xafiiska dawladdu wuxuu yeellan doonaa diiwaanno lagu hubiyo gedabyada maaliyadeed ee walax kharasheed kasta habka uu u xeeriyey wasiirku.
8. Wasaaradda Maaliyadda oo kaliya ayaa awood u leh isbadalka mushaaraadka iyo gunnooyinka billaha ah ee saameynta dhaqaale yeelanaya.

3.6 Qodobka 18^{aad} Lacag Bixinta Agabka iyo Adeegga

1. Ka sokow foojarada kale ama cadaymaha loo bahan yahay, Xafiis kasta oo dawladeed ma bixin karo lacag illaa uu xaqijiyo ama hubiyo madaxa xafiisku ama cidda kale ee uu madaxa xafiisku u xil saaray.

B. Marka lacag bixintu tahay mid la xidhiidha hawl u baahan in la qabto, Allaab keenid ama addeeg waa in ay.

- I. Waa in ay tahay shaqada laqabtay, allaabta la keenay ama adeegga la bixiyay & qiimaha la saaray mid waafaqsan heeshiiska ama haddii ayna heshiiska ku caddayn uu noqdaa mid macquul ah.
- II. Waa in ay noqoto mid-waafaqsan shuruudaha heeshiiska kharash bixintu, ka hor inta aan la dhammaystirin shaqada, aan la soo xarayn allaabta ama la helin adeegga

III. Waa in ay ahaato kharash bixinta mashaariicdu mid waafaqsan nidaamka iyo awaamiirta u deggan Wasaaradda, islamarkaana mac-quul ah oo sugan: Ama

T. Lacagta kharash kasta oo kale waa in ay ahaato mid uu lacag-qaatuhu xaq uleeyahay, qaadashada lacagta uu qaatay.

2. Wasaaraddu waxay soo saari kartaa nidaam lagu xaqiijinayo ama hubbinayo xaqiiqda cadaymaha uu u baahan yahay qodobkani.
3. Xafiisyada Dawladdu waxay yeelan doonaan sanduuq ay ku kayd sadaan lacagta hawl fulinta cadadka yar, cadadka lacageed ee loo istic-maali doono hawl-fulin waxaa go'aamin doona wasiirka.

3.7 Qodobka 19^{aad} Lacagta aan la Ictic-maalin

1. Iyadoo lagu xeerin doono wareegtooyin ay wasaaraddu soo saarto ayaa waxaa lagu celin khasnada dhexe hadhaaga Miisaaniyadda la qoondeeyey ee sanad Miisaaniyadeedku ka dhacay, aan la istic-maalina. Waxaana lagu kordhinayaa sanduuqa qasnada dhexe ee wasaaradda.

3.8 Qodobka 20^{aad} Dhicitaanka Qoondooyika Dhamaadka Sanad Xisaabeedka

1. Dhamaan qoondoonyinka aan la isticmaalin iyo kuwa aan la gadbin ee Miisaaniyadda la qoondeeyey waa dhacayaan dhamaadka sanad maaliyadeedka si waafaqsan qodobka 34(1) ee sharciga maareynta maaliyadda Lr. 17 December 25, 2019.
2. Dhamaan lacagaha aan la bixin ee laga gadbay Miisaaniyadda la qoondeeyey aanse la bixin ka hor dhamaadka sanad maaliyadeedka waxaa loo diyaarinayaa in lagu bixiyo muddo aan ka badneyn 30 cisho laga soo bilaabo dhamadka sanadka tagay, haddaba, tani waxay ku xidhnaan doonta awoodda dakhli iyo ogolaanshaha Xisaabiyaha Guud si waafaqsan qodobka 34(2) ee sharciga maareynta maaliyadda Lr. 17 December 25, 2019.
3. Diiwaangalinta, xisaabinta iyo warbixinada lacagaha aan la bixin waxaa lagu qeexi doonaa habraac lagu soo saarayo wareegtada dhaqagalinta Miisaaniyadda, wax gadeb ah lama gali karo wixii ka danbeeya 10th December si waafaqsan qodobka 34(3) ee sharciga maareynta maaliyadda Lr. 17 December 25, 2019.

3.9 Qodobka 21^{aad} Maamulka Deeqaha Maamul Goboleedyada

1. Deeqaha Dawlad Goboleedyada ku jira Miisaaniyadda Sanadka 2026 ee ka imaanaya dibedda waxaa loo qaybin doonaa dhammaan Dawlad Goboleedyada xubnaha ka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya, ee hadda jira iyo Gobolka Banaadir iyadoo lagu maamuli doono sida deeqaha loo qaybsanayo heshiiskii 2023.

3.10 Qodobka 22^{aad} Warbixin Xisaabeedka

1. Dhamaan Hay'adaha Dowladda waa in ay u keenaan Xisaabiyaha Guud iyo Agaasimaha Miisaaniyadda ee Wasaradda dhamaan xisaab xidhka kharajka iyo dakhliga ee bishaas ugu danbeyn 7da bisha xigta iyadoo la raacayo qaabka uu tilmaami doono Xisaabiyaha Guud. Waxaa awood loo siiyey Wasaaradda inay hakiso bixinta qoondaha ee miisaaniyadda ee hayadaha keeni waaya xisaab-xirka billaha ah.
2. Maamul goboleedyada iyo Gobolka Banaadir waxaa laga doonaya in ay soo xisaab celiyaan isticmaalka lacagaha dowladda dhexe oga wareejiyay Miisaaniyadda muddo saddex bilood ah bil gudaheed dhamaadka saddex biloodlaha;
3. Wasiirka wax lacag ah uma wareejin doono maamulka aan soo xisaab celin xisaabtii hore ee ku xusan faqrada 2^{aad} ee qodobkan;
	2113	Gunnyoyin (in cash)			7,200
	22	Isticmaalka Adeegga & Agabka	359,886	-	312,000
	221	Kharashka socdaalka iyo Shirarka	109,158	-	80,000
	2211	Kharashka socdaalka iyo Shirarka	109,158	-	80,000
	222	Kharashaadka Joogtada ah	17,801	-	77,000
	2221	Hawlaha Guud			50,000
	2223	Shidaalka iyo Saliidda			20,000
	2224	Alaabta Xafiiska iyo Agabyada kale	9,000	-	7,000
	2225	Dayactir iyo Hagaajin	8,801	-	-
	223	Kiro	14,750	-	28,000
	2231	Kiro	14,750	-	28,000
	224	Kharashaadka Kale Ee Joogtada ah	218,177	-	127,000
	2241	Kharashka waxbarashada iyo Tababarada			40,000
	2242	Adeegga Latalinta iyo Xirfadaha	216,832	-	84,000
	2243	Khidmadaha Howl Fududeynta	1,345	-	3,000
70243	70243	Mashruuca Xirfadda, Shaqaalaysiinta, iyo Wax soo saarka	386,559	4,648,045	3,787,510
	22	Isticmaalka Adeegga & Agabka	308,694	2,092,796	1,232,261
	221	Kharashka socdaalka iyo Shirarka	9,150	93,548	82,548
	2211	Kharashka socdaalka iyo Shirarka	9,150	93,548	82,548
	222	Kharashaadka Joogtada ah	8,682	20,664	22,092

	2223	Shidaalka iyo Saliidda		3,600	4,200
	2224	Alaabta Xafiiska iyo Agabyada kale	8,682	13,692	13,692
	2225	Dayactir iyo Hagaajin		3,372	4,200
	224	Kharashaadka Kale Ee Joogtada ah	290,862	1,830,809	1,127,621
	2241	Kharashka waxbarashada iyo Tababarada		238,628	455,071
	2242	Adeegga Latalinta iyo Xirfadaha	283,495	1,585,408	660,469
	2243	Khidmadaha Howl Fududeynta	7,367	6,774	12,080
	226	Kharaashaadka Kale	-	147,775	-
	2261	Kharashaadka Kale ee agab iyo adeeg		147,775	-
	31	Kharashaadka Raasumaalka	77,865	2,555,249	2,555,249
	311	hantida ma guurtada ah	77,865	2,555,249	2,555,249
	3111	Qaabeynta iyo Dhidda dhismayaasha		1,910,994	1,910,994
	3112	Mashiinada iyo Qalabka	77,865	644,255	644,255
70256	70256	Mashruuca Abuurista Fursado Shaqo iyo Kabista Dhalinyarada Som.	-	-	66,465,500
	21	Adeegga Shaqaalaha	-	-	84,000
	211	Gunnyoyinka & Mushaharka	-	-	84,000
	2113	Gunnyoyin (in cash)			84,000
	22	Isticmaalka Adeegga & Agabka	-	-	31,221,500
	221	Kharashka socdaalka iyo Shirarka	-	-	160,000
	2211	Kharashka socdaalka iyo Shirarka		-	160,000
	222	Kharashaadka Joogtada ah	-	-	252,000
	2221	Hawlaha Guud			42,000
	2222	Isgaadhsiinta			48,000
	2223	Shidaalka iyo Saliidda		-	36,000
	2224	Alaabta Xafiiska iyo Agabyada kale		-	108,000
	2225	Dayactir iyo Hagaajin		-	18,000
	223	Kiro	-	-	132,000
	2231	Kiro			132,000
	224	Kharashaadka Kale Ee Joogtada ah	-	-	30,645,500
	2241	Kharashka waxbarashada iyo Tababarada		-	120,000
	2242	Adeegga Latalinta iyo Xirfadaha		-	29,476,000
	2243	Khidmadaha Howl Fududeynta		-	975,000
	2244	Iidhehyada iyo astaan siinta			36,000
	2245	Kharshyada Ceymiska			38,500
	226	Kharaashaadka Kale	-	-	32,000
	2261	Kharashaadka Kale ee agab iyo adeeg		-	32,000
	26	Deeq	-	-	160,000
	263	Deeqaha Waaxyaha Dowladda Dhexdeeda	-	-	160,000

2631	Deeqaha Joogtada Ee Dowladda Dhexdeeda			160,000
27	Kabidda Bulshada	-	-	35,000,000
271	Social Security benefits	-	-	13,000,000
2711	Social security benefits in cash			3,000,000
2712	Social security benefits in kind			10,000,000
272	Social Assistance Benefits	-	-	22,000,000
2721	Social assistance benefit in cash			22,000,000

5.8 QORSHAHA SANADLAHA AH EE AMAHASHADA QARANKA EE SANADKA 2026

Qaybta 1-aad: Hannaanka Diyaarinta Qorshaha Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka

Qorshahan Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka ee Sanad Maaliyadeedka 2026 waxaa loo diyaariyey si waafaqsan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019, iyo Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo Soo-Saarista Dammaanaddaha ee 2024.

Si waafaqsan Qodobka 35-aad ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019, Baarlamaanka Federaalka ayaa go'aaminaya xadka lama dhaafaanka ah ee deymaha cusub (oo ay ku jiraan deymaha dibadda iyo gudaha), iyo sidoo kale shuruudaha iyo xeerarka guud ee hagaya habka loo soo qaadanaayo deymaha. Sidaa darteed, xadka lama dhaafaanka ah ee deymaha cusub, iyo shuruudaha iyo xeerarka guud ee hagaya waxay dhaqangalayaan kadib markii Baarlamaanka Federaalka si rasmi ah u ansixiyo, kadibna uu dhaqan-galo Sharcigan Qoondada Miisaaniyadda oo ka kooban Lifaaqan Qorshaha Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka.

Dhanka kale, Qodobka 3-aad ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo Soo-Saarista Dammaanaddaha ee 2024 ayaa qeexayaa habka dhaqangelinta Qodobka 35-aad ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019. Qodobkan ayaa caddeynaya in Qorshaha Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka uu yahay hannaanka rasmiga ah ee Dowladda Federaalka Soomaaliya u adeegsanayso soo gudbinta xadka lama dhaafaanka ah ee deymaha cusub iyo sidoo kale shuruudaha iyo xeerarka guud ee hagaya qaadashada deymaha/amaahda, kuwaas oo Baarlamaanka Federaalku ansixinaayo.

Haddaba, iyadoo lagu saleynayo ujeedooyinka qodobbada sharci ee faqrada kore lagu sharaxay, Qorshahan Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka ee kujira Lifaaqan wuxuu leeyahay laba ujeedo oo muhiim ah. Marka koowaad, wuxuu bixinaya ansixin qeexaysa shuruudo iyo xeerar cadcad oo hagaya amaahda/deymaha cusub ee sanadka 2026, isagoo dejinaaya xadka lama dhaafaanka ah ee deymaha cusub iyo habraacyada maaliyadeed ee taxaddarka leh ee Dowladda ay tahay inay raacdo, si loo hubiyo in amaahdu noqoto mid mas'uuliyad ku jirto oo aan khatar ku keenayn maaliyadda dalka. Marka labaad, wuxuu xoojinayaa hufnaanta iyo isla xisaabtanka, isagoo u oggolaanaya Baarlamaanka Federaalka iyo dadweynaha inay si cad u arkaan sida amaahda loo qorsheeyay, loona maamuli doono, si loo xaqiijiyo in ay noqoto mid la awoodi karo, la saadaalin karo, lana maareyn karo muddo dheer, iyadoo aan waxyeello loo geysan xasilloonida maaliyadeed ee Dowladda.

Qorshahan Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka waxaa diyaariyay Waaxda Maareynta Deymaha ee Wasaaradda Maaliyadda, iyadoo loo hoggaansamayo qodobbada khuseeya ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019, iyo Qodobka 3-aad ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo Soo-Saarista Dammaanaddaha ee 2024. Sidoo kale, diyaarinta qorshahan waxaa sidoo kale

lagu saleeyay wada-tashiyo qoto-dheer oo lala yeeshay qaybo kamid ah hay'adaha Dowliga ah iyo hay'adaha caalamiga ah, oo ay ku jirto Sanduuqa Lacagta Adduunka (IMF).

Qaybta 2-aad: Waafajinta Qorshaha Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS) ee 2025–2029

Qorshahan Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka ee 2026 wuxuu si buuxda u waafaqsan yahay Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS) ee ugu horreysay ee Soomaaliya, taas oo loogu talagalay muddada u dhaxaysa 2025 ilaa 2029. Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha waxay astaan u tahay guul istiraatiiji ah oo ay Dowladda Federaalka Soomaaliya ka gaartay dhanka qorshaynta iyo maareynta deymaha qaranka, maadaama ay si cad u dejinayso jihada iyo hannaanka siyaasadeed ee hagi doona qaabka ay Dowladda u heli lahayd deymo leh shuruudo deeysi ah (concessional financing), iyada oo isla mar ahaantaasna qeexaysa tallaabooyin si taxaddar leh loogu xakameynaayo khataraha maaliyadeed ee la xiriira deymaha, si aanay khatar ugu noqon xasilloonida dhaqaalaha guud iyo maaraynta waarta ee deymaha qaranka.

Waxaa xusid mudan in Qorshahan Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka uu yahay aalad istiraatiiji ah oo muhiim u ah hirgelinta Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha sanad kasta. Si loo gaaro yoolalka iyo himilooyinka ku cad Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe, Qorshahan ayaa u beddelaya himilooyinkaasi tallaabooyin sanadle ah oo la taaban karo, kuwaas oo ka kooban: qadarka lacageed ee la qorsheynayo in la amaaho sanadkaas, noocyada kala duwan ee aaladaha maalgelin ee la adeegsanayo, iyo ilaha maalgelinta ee la qorsheeyay in la isticmaalo, iyadoo si buuxda loo ilaalinayo xayndaabka sharciyeed ee deymaha ee Baarlamaanka Federaalku ku dejiyey Qorshahan Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka.

Si loo gaaro ujeedooyinka Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019, iyo Xeer-nidaamiyahiisa Xayndaabka Siyaasadda Deymaha ee 2024, Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha (MTDS) waxaa loo diyaariyey si nidaamsan oo ku saleysan falanqayn iyo qiimeyn qotodheer oo lagu sameeyay istiraatiijiyadaha kala duwan ee amaah-qaadashada, iyadoo la adeegsanayo halbeegyada cabbira kharashka iyo khataraha, kuwaas oo ay dejiyeen Bankiga Adduunka iyo Sanduuqa Lacagta Adduunka. Falanqayntan ayaa muujisay in istiraatiijiyadda ku habboon duruufaha dhaqaale iyo maaliyadeed ee Soomaaliya ay tahay in la sii wado ku-tiirsanaanta amaahda dibadda ee leh shuruudo deeqsinimo sare (highly concessional financing), maadaama ay suurtagelinayso isu-dheellitirnaanta ugu wanaagsan ee u dhaxaysa kharashka iyo halista la xiriirta deymaha waqtigan la joogo. Sidaas darteed, Qorshahan Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka waxa uu si buuxda ugu tarjumayaa habraacyada iyo xeerarka lagu qeexay Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha.

Qaybta 3-aad: Xadka Lama Dhaafaanka ah ee Deymaha Cusub iyo Shuruudaha iyo Xeerarka Guud ee Hagaya Deymaha Cusub

Si waafaqsan Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha ee 2025–2029, Dowladda Federaalka Soomaaliya waa in ay maaliyadda guud u maamusho si taxaddar leh, hufan, isla markaana daahfuran. Sidaas darteed, inta lagu jiro muddada dhexe, is-dhinka maaliyadeed ee guud (overall fiscal deficit) waa in aanu ka badnaan 3.5% wax-soo-saarka guud ee dalka (GDP). Intaa waxaa dheer, maalgelinta lagu daboolayo is-dhinkaasi waa in inta badan laga helo deymo dibadeed oo leh shuruudo deeysi ah (concessional loans), halka 1.5% ka mid ah is-dhinkaas lagu daboolayo maalgelin ka timaada deyn-bixiyeyaasha caalamiga ah ee bixiya deymaha leh shuruudo deeqsinimo sare (highly concessional financing).

Sidaas awgeed, iyadoo lagu saleynayo qiimeynta Dowladda Federaalka ee sannad maaliyadeedka 2026, baahida guud ee maalgelineed (GFN) waxaa lagu qiyaasay inay gaareyso 0.6% wax-soo-saarka gudaha ee dalka (GDP). Sidaas darteed, Dowladda Federaalka waxaa halkan loogu oggolaaday in qayb ka mid ah baahidan maalgelineed laga daboolo kaydka lacagta ee hadda jira (buffer), halka qaybta harsanna laga maalgelin doono iyadoo la adeegsanayo amaah dibadeed, oo ay ku jirto amaah leh shuruudo deeqsinimo sare (highly concessional loans) oo ka timaadda Bankiga Maalgelinta ee Yurub (EIB), taasoo marka la helo dib loogu sii-amaahin doono Bankiga Horumarinta iyo Dib-u-dhiska ee Soomaaliya.

Iyadoo aan loo eegin xeer-nidaamiye kasta oo khilaafsan faqraddan, isla markaana loogu talagalay hirgelinta Qodobka 36(2) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019, Wasiirka Maaliyadda waxaa awood loo siiyay inuu dib-u-sii-amaahin karo (on-lend) Bankiga Horumarinta iyo Dib-u-dhiska Soomaaliya, amaahda leh shuruudaha deeqsiga ah ee laga helay Bankiga Maalgashiga Yurub (European Investment Bank), iyadoo la raacayo shuruudaha soo socda:

- (1) Ka hor inta aan la saxiixin heshiiska dib-u-sii-amaahinta, Waaxda Maareynta Deymaha ee Wasaaradda Maaliyadda waa inay fulisaa qiimeyn dhammaystiran oo ku saabsan dhammaan khataraha suurtagalka ah, iyo tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee lagu yareynayo, laguna maareynayo khatarahaas, iyadoo la hubinayo in talooyinka iyo tallaabooyinka la soo jeediyay ay si cad u hagaan diyaarinta, ansixinta, iyo fulinta heshiiska.
- (2) Heshiiska dib-u-sii-amaahinta waa in si rasmi ah looga diiwaangeliyo Xafiiska Hantidhawraha Guud laba (2) toddobaad gudahood ka dib marka la saxiixo, iyadoo isla waqtigaas nuqulo ka mid ah heshiiska la saxiixay loo soo gudbinayo Baarlamaanka Federaalka, si kor loogu qaado hufnaanta iyo daahfurnaanta.
- (3) Heshiiska dib-u-sii-amaahinta waxa uu dhaqan galayaa isla marka uu la saxiixo, iyadoo lagu salaynayo shuruudaha ku cad heshiiska laftiisa, mana u baahna ansixin, xaqiijin, ama tallaabo maamul oo dheeraad ah si loo dhaqangeliyo.

Haddaba, iyadoo laga duulaayo Qodobka 35-aad ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019, iyo Qodobka 3-aad ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo Soo-Saarista Dammaanaddaha, 2024, wadarta guud ee amaahda cusub ee sannad maaliyadeedka 2026 waxaa lagu xaddiday (annual ceiling) in aysan ka badnaan karin 2% waxsoo-saarka guud ee dalka (GDP). Xadkaani waxa lagu

dabaqayaa dhammaan amaahda cusub ee la qaato inta lagu guda jiro sannad maaliyadeedka 2026, isagoo qeexaya xadka ugu sarreeya ee la amaahan karo, oo ay tahay in siyaasadda iyo hawlgallada amaahda qaranka u hoggaansamaan.

Intaa waxaa dheer, si loo xaqiijiyo in amaahdu noqoto mid la awoodi karo, isla markaana loo yareeyo khatarta maaliyadeed ee ka dhalan karta, loona waafajiyo Istiraatiijiyadda Muddada Dhexe ee Maareynta Deymaha 2025–2029, dhammaan amaahda la soo qaadanayo iyadoo loo hoggaansan yahay xadka lagu qeexay faqradda sare waa in lagu helo shuruudo deeqsinimo sare leh (highly concessional terms).

Qaybta 4-aad: Hagaha Fulinta Qorshaha Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka

Qorshahan Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka wuxuu qeexayaa hannaanka sharci iyo siyaasadeed ee lagama maarmaanka u ah maaraynta dhammaan hawlaha amaah-qaadashada ee sanadka 2026, oo ay ku jiraan xadka lama dhaafaanka ah ee deymaha cusub iyo shuruudaha iyo xeerarka guud ee hagaya. Sidaa darteed, si loo xaqiijiyo fulinta wax-ku-oolka ah ee Qorshahan, Wasaaradda Maaliyaddu waa inay diyaarisaa Hagaha Fulinta Qorshaha Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka, isla markaana u gudbisaa Golaha Wasiirrada si loo ansixiyo. Hagahan Fulinta wuxuu ka koobnaan doonaa nooc faahfaahsan oo ah Qorshaha Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka, kaas oo:

- (1) Qiimayn faahfaahsan ku samaynaya baahida dhabta ah ee maalgelineed, iyadoo lagu salaynayo falanqeyn qoto-dheer oo ku saabsan saadaasha dakhliga gudaha, deeqaha, kharashaadka, waajibaadka maaliyadeed ee dib-u-bixinta deymaha (gaar ahaan dib-u-bixinta qaybaha asalka ah ee deymaha), iyo lacagaha dibadda ee la filayo ee mashaariicda socda, si loo qiyaaso guud ahaan qadarka loo baahan yahay in la amaahdo.
- (2) Qeexaya, walibana kala sarreysiinaya ilaha suurtagalka ah ee maalgelinta iyo noocyada aaladaha maaliyadeed ee loo adeegsanaayo amaah-qaadashada, iyadoo la hubinayo inay u hoggaansamaan shuruudaha, xeerarka guud, iyo xaddidaadaha lagu dejiyey Qorshahan Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka.

Hagaha Fulinta Qorshaha Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka waxaa loo gudbinayaa Golaha Wasiirrada si loo ansixiyo muddo bil gudaheed ah ka dib marka Sharcigan Qoondada Miisaaniyadda uu dhaqangalo. Habraacan ka kooban labada waji, waxaa loogu talagalay in Baarlamaanka Federaalka uu marka hore dejiyo xadka deymaha cusub ee aan la dhaafi karin, iyo sidoo kale shuruudaha iyo xeerarka guud ee hagaya, ka dibna Golaha Wasiiradu ay soo saaraan Hagaha Fulinta Qorshaha Sanadlaha ah ee Amaahashada ee Qaranka, iyadoo la raacayo Qodobka 99(b) ee Dastuurka KMG ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

5.9 HANNAANKA DAMMAANADQAADYADA AAN DEYNTA KU-SABSANAYN: DAMMAANADQAADYADA DALBASHADA DEGDEGGA AH (DEMAND GUARANTEE)

Qodobka 1-aad: Saldhiga Sharci

1. Sida ku cad faqradda 6-aad ee Qodobka 37-aad ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019, iyo Qodobka 7-aad ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo Soo-Saarista Dammaanaddaha, 2024, Lifaafa kani waxa uu qeexayaa nooc gaar ah oo dammaanad dowladeed ah oo ka mid ah dammaanadqaadyada aan deynta ku-sabsanayn ee uu ansixinayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya. Waxa kale oo Lifaafani dejinayaa shuruudaha iyo xeerarka guud (general terms and conditions) oo waajibka ah in la raaco marka dammaanadqaadyada noocan ah ay ansixiyaan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.
2. Nooca dammaanadqaadyada aan deynta ku-sabsanayn ee halkan lagu qeexayo, waxaa loogu yeerayaa Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee). Dammaanadqaadyadani waa ballan cad oo lacag bixin degdeg ah oo ay bixinayso Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana loogu talagalay in lagu xaqiijiyo in shirkadaha gaarka loo leeyahay ee ka shaqeeya bixinta adeegyada dadweynaha, dhismaha kaabayaasha muhiimka ah, ama fulinta mashaariicda kale ee istiraatiijiga ah ay helaan dakhliga ugu yar ee ku filan hawlgalladooda (minimum revenue).

Qodobka 2-aad: Ujeeddada iyo Baaxadda Lifaafa

1. Ujeeddada ugu weyn ee Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantees) ayaa ah in lagu dhiirrigeliyo maalgashadayaasha iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay inay si kalsooni leh ugu dhiiradaan maalgelinta mashaariicda adeegyada dadweynaha iyo kuwa kaabayaasha dhaqaalaha. Dammaanadahan ayaa door muhiim ah ka qaata yareynta khataraha maaliyadeed ee ay la kulmi karaan maalgashadayaasha iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay, gaar ahaan marka ay suurtagal tahay in dakhliyadii la filayay aan la helin ama ay hoos u dhacdo baahida bulshada ee adeegyada ay bixiyaan.
2. Damaanadahan waxay bixiyaan kalsooni iyo hubinta buuxda oo ay helaan maalgashadayaasha iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay ee ka qeyb qaadanaya fulinta mashaariicda istiraatiijiga ah ee Dowladda. Ujeeddada damaanadahan ayaa ah in la xaqiijiyo in haddii maalgashadayaasha ama shirkadaha gaarka loo leeyahay ay ku guuldareystaan inay gaaraan dakhliga ugu yar ee ku filan hawlgalladooda (minimum revenue) ama heerka adeeg-bixineed ee lagu heshiiyay, in Dowladda Federaalka ay ballanqaadayso inay bixiso farqiga dakhli ee ka dhasha hoos u dhacaas. Taageeradan damaanadeed ayaa door muhiim ah ka ciyaarta xaqiijinta in mashaariicda waaweyn ee laf-dhabarka u ah horumarka Dalka ay noqdaan kuwo la maalgelin karo, la heli karo, isla markaana si joogto ah u sii shaqeeya, xitaa marka xaaladaha dhaqaalaha ay adkaadaan ama dakhligoodu hoos u dhaco.

3. Dammaanadqaadyadan Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee) ee la bixiyo ama la oggolaado waxay noqon doonaan oo keliya waajibaad maaliyadeed oo shuruud ku xiran (contingent liabilities) oo mustaqbalka ka dhalan kara mashaariicda Dowladda Federaalka haddii hoos u dhac ku yimaado dakhliga la filayay, taasoo micnaheedu yahay inaysan ahayn amaah dowladeed ama deyn toos ah oo lagu leeyahay Dowladda Federaalka. Sidaa darteed, dammaanadahan waa in si taxadar leh loo diiwaangeliyo, si hufan loo maamulaa, lagana soo gudbiyaa warbixinnada ku habboon, iyadoo si buuxda loogu dhaqmaayo shuruucda iyo xeerarka maareynta maaliyadda guud ee Dalka.

Qodobka 3-aad: Awoodda Wasiirka Maaliyadda

1. Si waafaqsan Qodobka 35(1) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019, iyo Qodobka 7(4) ee Xeeridaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo Soo-Saarista Dammaanaddaha ee 2024, marka uu dhaqan-galo Sharcigan Qoondada Miisaaniyadda oo ka kooban Lifaaqan, Wasiirka Maaliyadda oo keliya, oo ah Dammaanad-bixiyaha Qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, ayaa leh awoodda gaarka ah ee bixinta ama oggolaanshaha Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee), iyadoo xadka ugu sarreeya ee dammaanadqaadyada guud ee noocooda lagu ansixiyay Lifaaqan uusan ka badnaan karin xadka lagu qeexay faqrada 2-aad ee Qodobkan 3aad.

2. Wasiirka Maaliyadda waa inuu bixiyo ama uu oggolaado dhammaan Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee), isagoo raacaya shuruudaha iyo xeerarka guud (general terms and conditions) ee ku cad Qodobka 4-aad ee Lifaaqan. Hase yeeshee, wadarta qiimaha guud (payout stock) ee dhammaan Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah ee hadda jira iyo kuwa la qorsheynayo, oo ay ku jiraan kuwa cusub ee la bixin doono, waa in aysan ka badnaan 0.5% wax-soo-saarka gudaha (GDP) ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Sanad Maaliyadeedka 2025.

3. Marka Wasiirku isticmaalayo awoodaha ku xusan Lifaaqan, waa inuu ku dhaqmaa, isla markaana si buuxda ugu hoggaansamaa shuruudaha iyo xeerarka guud ee lagu ansixiyay Lifaaqan qaybta ah Sharcigan Qoondada Miisaaniyadda. Wasiirku sidoo kale waa inuu hubiyaa in dhammaan shuruucda, iyo xeerarka maaraynta maaliyadda guud, si sax ah oo hufan loo raaco.

Qodobka 4-aad: Shuruudaha iyo Xeerarka Guud

1. **Qiimeynta Khataraha:** Kahor inta aan la bixin ama la oggolaan mid ka mid ah Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee), Waaxda Maareynta Deymaha ee Wasaaradda Maaliyadda waa inay sameysaa qiimeyn khataro oo dhammeystiran, iyadoo la tashaneysa Wasaaradda ama Hay'adda mas'uulka ka ah mashruuca. Qiimeyntan waa inay si faahfaahsan u baartaa kharashka maaliyadeed ee Dowladda laga yaabo in ay bixiso, suurtagalnimada

in lacagta dammaanadqaadka la dalbado, iyo khataraha hawlgaal iyo maaliyadeed ee saameyn kara guusha mashruuca lagu taageeraayo dammaanadqaadka, iyo sidoo kale tallaabo kasta oo lagama maarmaan ah oo lagu yareynayo khatarahaas. Haddaba, iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka qiimeyntan, Wasiirku waa inuu ka helo kalsooni buuxda, kahor inta aan la bixin ama la oggolaan dammaanadqaadka, in suurtagalnimada in lacagta dammaanadqaadka la dalbado ay tahay mid aad u hooseysa, si looga hortago in dammaanadqaadku isu beddelo deyn si toos ah Dawladda ugu waajibaysa.

2. **Dhaqangalka Sharci:** Dhammaan Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee) ee la bixiyo ama la oggolaado iyadoo loo hoggaansamaayo Lifaaqan waxay dhaqangelayaan isla marka la saxiixo heshiiska lagu bixinaayo. Sidaas awgeed, Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah waxay dhaqangelayaan iyadoo loo eegayo shuruudaha ku qoran heshiiska lagu bixiyay, mana jiri doonto ansixin, xaqiijin, ama talaabo maamul oo dheeraad ah oo lagu ansixinaayo.

3. **U Hoggaansanaanta Shuruudka iyo Xeerarka:** Dhammaan Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee) waa in loo bixiyo, loo oggolaado, loona maamulo iyadoo si buuxda loogu hoggaansamayo dhammaan shuruudka iyo xeerarka Qaranka, oo ay ku jiraan shuruudka iyo xeerarka Maareynta Maaliyadda Guud. Intaa waxaa dheer, dhammaan Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee) waa in lagu dhaqaa shuruudaha iyo xeerarka guud (general terms and conditions) ee lagu ansixiyay Lifaaqan qaybta ka ah Sharcigan Qoondada Miisaaniyadda.

4. **Suggida Awoodda Dammaanad Bixinta:** Wasiirka Maaliyadda, haddii uu arko in ay suurtagal u tahay Dawladda Federaalka, waxa uu qaadi karaa tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si loo xaqiijiyo awoodda dammaanad-bixinta. Tallaabooyinkan waxaa ka mid noqon kara samaynta koontooyin kayd oo gaar ah oo dabooli kara waajibaadyada maaliyadeed ee dammaanadqaadyada, ama isticmaalka aalado kale oo maaliyadeed oo ku habboon. Ujeeddada tallaabooyinkan ayaa ah in la hubiyo in lacag kasta, oo loogu baahan yahay si loo fuliyo waajibaadyada maaliyadeed ee ka dhalan kara Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee), lagu bixin karo si hufan, la isku halleyn karo, oo waafaqsan habraacyada maaliyadeed iyo nidaamka sharci ee Dalka.

5. **Kormeerka iyo La-socoshada:** Wasiirka Maaliyadda ayaa ugu horreyn mas'uul ka ah kormeerka iyo lasocoshada joogtada ah ee dhammaan Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee) ee loo bixiyay ama loo oggolaaday si waafaqsan Lifaaqan. Hawsha kormeerka iyo la-socoshada waxay ka koobanaan kartaa xaqiijinta in dhammaan damaanaduhu ay u hoggaansamaan shuruudaha iyo xeerarka guud ee la ansixiyay, qiimeynta khataraha la xiriira damaanadaha, iyo qaadista tallaabo kasta oo lagama maarmaan ah si loo xakameeyo ama loo yareeyo waajibaadka maaliyadeed ee suurtagalka noqon kara.

6. **Joojinta Dammaanado La Bixiyay:** Wasiirka Maaliyaddu waxa uu leeyahay awood sharciyeed uu ku joojin karo Dammaanad-qaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantees) ee hore loo bixiyay ama loo oggolaaday, si waafaqsan Lifaaqan, haddii heshiiska dammaanad-qaadkaasi uu oggol yahay in la joojiyo, ama ay dhacaan duruufo gaar ah oo ka dhigaya joojintaas mid lagama maarmaan u ah ilaalinta danta guud ama sugidda xasilloonida maaliyadeed ee Dowladda Federaalka. Haddii ay suuragal noqoto in dammaanadda la joojiyo, go'aankaasi waa in lagu soo saaraa qoraal rasmi ah, waxaana ogeysiiska qoraalkaas la siinayaa shirkadda gaarka loo leeyahay ee ay khusayso, Waaxda Maareynta Deymaha, Xisaabiyaha Guud, iyo Hantidhawraha Guud. Kahor inta aan la joojin dammaanad gaar ah, Wasiirku waa inuu xaqiijiyaa in aanay jirin wax waajibaad maaliyadeed oo wali taagan oo ka dhashay dammaanadqaadkaas, ama in ay jiraan qorshayaal lagu hubinayo in waajibaadkaas taagan lagu fulin karo si waafaqsan shuruucda iyo habraacyada Dalka. Joojinta dammaanad gaar ah ma saamaynayso waajibaad kasta oo maaliyadeed oo la xaqiijiyay ka hor inta aan go'aanka joojintu dhaqangelin. Go'aanka lagu joojinayo dammaanad waa in lagu saleeyaa qiimeyn dhammaystiran oo hufan, si loo hubiyo in aanay dhicin khilaafyo sharci ama maaliyadeed oo dhaawici kara danaha Dowladda Federaalka Soomaaliya.

7. **Hannaanka Dalbashada Lacag-bixinta Dammaanadda:** Shirkadda gaarka loo leeyahay ee heshay Dammaanadqaadka Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee) waxay xaq u leedahay inay codsato bixinta lacagta dammaanadda, iyadoo soo gudbinaysa ogeysiis qoraal ah oo waafaqsan qodobada iyo shuruudaha ku xusan heshiiska dammaanadda. Si loo ilaaliyo danaha dhaqaale ee Dowladda Federaalka, Wasiirka Maaliyadda waa inuu hubiyaa in heshiis kasta oo dammaanad bixin ahi ay ku jiraan labadan qodob oo aasaasiga ah: (i) in Wasiirka Maaliyadda iyo Waaxda Maareynta Deymaha loo gudbiyo nuqulo rasmi ah oo ka mid ah ogeysiis kasta oo qoraal ah oo lagu dalbanayo lacag bixinta dammaanadda; iyo (ii) in ogeysiiskaasi si cad u qeexayo sababaha rasmiga ah ee keenay dalbashada iyo qaabka loo xisaabiyay qadarka lacageed ee la codsanayo. Marka Wasiirka Maaliyaddu helo dalabkaas, waa inuu xaqiijiyaa in dalbashadu si buuxda u waafaqsan tahay shuruudaha iyo qodobada ku xusan heshiiska dammaanadda, ka dibna uu abaabulo bixinta lacagta dammaanadda, iyadoo la raacayo jadwalka iyo habraacyada ku cad heshiiskaas. Haddii aan si gaar ah loogu cayimin arrimahaas heshiiska, Wasiirka Maaliyaddu waa inuu ku dhaqmaa xeerarka iyo hannaanka maaraynta maaliyadda guud ee Dalka.

8. **Hannaanka Maaraynta Damaanadaha:** Damaanad kasta oo la bixiyo ama la oggolaado iyadoo loo hoggaansamayo Lifaaqan waxaa lagu maamuli, lagu kormeeri, laguna diiwaangelinayaa si waafaqsan Hannaanka Maaraynta Damaanadaha ee lagu caddeeyey Qodobka 8-aad ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hannaanka Amaahashada iyo Soo-Saarista Dammaanaddaha ee 2024. Sidaas awgeed, Waaxda Maareynta Deymaha, oo kaashanaysa Xisaabiyaha Guud, waa in ay haysaa diiwaangelin dhameystiran oo hufan oo ku saabsan dhammaan damaanadaha dhaqangalka ah, isla markaana si joogto ah u kormeerta xaaladda ay ku suganyihiin damaanaduhu, si loo suurtageliyo qiimeyn sax ah oo ku saabsan halista ka imaan karta damaanadaha, loona fududeeyo go'aan qaadashada mustaqbalka ee la xiriirta bixinta ama oggolaanshaha damaanadaha.

Qodobka 5-aad: Warbixinta iyo Diiwaangelinta

1. Wasiirka Maaliyaddu waa inuu si degdeg ah ugu wargeliyaa Baarlamaanka Federaalka marka kasta oo Dammaanadqaad Dalbasho Degdeg ah (Demand Guarantee) la bixiyo ama la oggolaado, iyadoo loo hoggaansamayo Lifaaqan. Wargelintan waa inay ka koobnaataa dulmar kooban oo qeexaya shuruudaha muhiimka ah ee damaanadda, oo ay ku jiraan: (i) sharaxaad faahfaahsan oo ku saabsan mashruuca iyo maalgashiga ay damaanaddu taageerayso; (ii) dakhliga ugu yar ama heerka adeeg-bixineed ee damaanaddu xaqiijinayso; (iii) muddada heshiiska ee lagu bixiyay damaanadda; iyo (iv) qadarka ugu badan ee suurtagalka ah in lagu bixiyo damaanadda, iyo faahfaahin ku saabsan suurtoqalnimada in lacagtaas la dalbado.
2. Dhammaan heshiisyada lagu bixiyo Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdeg ah (Demand Guarantee) waa in loo gudbiyaa Hantidhawraha Guud si loo diiwaangeliyo, laba (2) toddobaad gudahood kadib marka la saxiixo heshiis kasta.
3. Nuqulo ka mid ah dhammaan heshiisyada la saxiixay ee lagu bixiyay dammaanadqaadyada waa in loo gudbiyaa Baarlamaanka Federaalka markii ay soo dalbadaan. Tani waxay xaqiijinaysaa hufnaanta habraaca dammaanad-bixinta, isla markaana waxay hubinaysaa in dhammaan heshiisyada dammaanadqaadyadu ay si buuxda ugu hoggaansan yihiin shuruudaha iyo xeerarka guud (general terms and conditions) ee lagu ansixiyay Lifaaqan.
4. Wasiirka Maaliyadda waa inuu Baarlamaanka Federaalka siiyo warbixin lix-bilood ah oo faahfaahsan oo ku saabsan dhammaan Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee) ee dhaqangalka ah. Warbixintan waa inay ka koobnaataa xaaladda ay ku sugantahay damaanad kasta, waajibaadka maaliyadeed ee suurtagalka ah, lacagaha dammaanadqaadyada ee lasoo dalbaday, iyo waajibaad kasta oo maaliyadeed oo weli taagan ee dammaanad ka dhashay. Warbixintu waa in ay waafaqsantahay Qodobada 8aad iyo 9-aad ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo Soo-Saarista Dammaanaddaha, 2024, kuwaas oo dalbanaya in dhammaan damaanadqaadyada si hufan loo kormeero, loo diiwaangeliyo, isla markaana si rasmi ah looga soo warbixiyo.

Qodobka 6-aad: Ansixinta Baarlamaanka iyo Muddada Dhaqangelka

1. Nooca Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee) ee lagu qeexay Lifaaqan, iyo sidoo kale xeerarka iyo shuruudaha guud ee hagaya bixintooda ama oggolaanshahooda, waxaa loo tixgelinayaa in si rasmi ah loo ansixiyay marka uu dhaqangalo Sharcigan Qoondada Miisaaniyadda ee 2026, kaas oo ka kooban Lifaaqan.
2. In kasta oo Sharcigan Qoondada Miisaaniyadda la ansixiyo sanad kasta, ansixinta noocan Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee) iyo shuruudaha iyo xeerarka guud ee hagaya bixintooda ama oggolaanshahooda waxay sii ahaan doonaan kuwo dhaqangel ah, sidoo

kalena waxay sii jiri doonaan xilliyada ka dambeeya Sanad Maaliyadeedka 2026. Sidaas darteed, ansixintan isma beddeli doonto ilaa laga soo saarayo sharci si cad wax uga beddelaya.

Qodobka 7-aad: Hannaanka Maareynta Khatarta

1. Wasiirka Maaliyadda oo keliya ayaa leh awoodda bixinta ama oggolaanshaha Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee), isagoo ay waajib kutahay in uu hubiyo in:

(b) Dammaanad kasta oo la soo jeediyo ay si qoto dheer u qiimeyso Waaxda Maareynta Deymaha, iyadoo la tashaneysa wasaaradda ama hay'adda mas'uulka ka ah mashruuca;

(t) Dhammaan heshiisyada lagu bixiyo dammaanadaha ay si buuxda ula socdaan shuruudaha iyo xeerarka guud ee Baarlamaanka Federaalka uu ku ansixiyay Lifaaqan.

(j) Dhammaan waajibaadyada la xiriira soo gudbinta warbixinnada iyo ogeysiisyada Baarlamaanka Federaalka, iyo ka diiwaangelinta heshiisyada Hantidhawraha Guud, si habsami leh loo fuliyo; iyo

(x) Dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee lagu kormeerayo, laguna yareynayo khataraha maaliyadeed ee suurtagalka ah, loo hirgeliyo si wax ku ool ah.

2. Waaxda Maareynta Deymaha, iyadoo raacaysa tilmaamaha Wasiirka, waxa ay mas'uul ka tahay hubinta in dhammaan Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee) si sax ah loo diiwaangeliyo, isla markaana si joogto ah loo kormeero, iyadoo la raacayo Qodobbada 8-aad iyo 9-aad ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo SooSaarista Dammaanaddaha, 2024. Si waajibaadkan ay u fuliso, Waaxda Maareynta Deymahu waxay qabanaysaa hawlo ay ka mid yihiin qiimeynta joogtada ah ee khataraha maaliyadeed ee suurtagalka ah, diyaarinta warbixinno faahfaahsan, iyo hubinta in dhammaan macaamilada la xiriira damaanadaha loo fuliyo si hufan, isla xisaabtan leh, oo waafaqsan shuruudaha iyo xeerarka maaraynta maaliyadda guud.

Qodobka 8-aad: Hannaanka Guud ee Lifaaqan Lagu Dejiyay

Lifaqaani wuxuu dejinayaa habraac dhameystiran oo cad oo loogu talagalay bixinta ama oggolaanshaha Dammaanadqaadyada Dalbashada Degdegga ah (Demand Guarantee) ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Waxa uu hubinayaa in Wasiirka Maaliyaddu uu ku shaqeeyo shuruudaha iyo xeerarka guud ee ay ansixiyeen Baarlamaanka Federaalka. Sidoo kale, Lifaqaani wuxuu bixinayaa hab nidaamsan oo lagu taageeri karo maalgashadayaasha iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay ee ka qeyb qaata bixinta adeegyada dadweynaha, dhismaha kaabayaasha muhiimka ah, iyo hirgelinta mashaariicda kale ee istiraatiijiga ah, iyadoo la xaqiijinayo daahfurnaan, isla xisaabtan, iyo maarayn hufan oo waafaqsan shuruudaha Dalka.



XEER MADAXWEYNE LR. 477

TAARIIKH: 21-DA LUULIYO 2025

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad}, Farqadda 1^{aad}, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2^{aad} ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay 02/03/1962, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay WC&AD/XW/2055/2025, ku taariikheysan 02/02/2025, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Noot-aayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Ahmed Hassan Osman**.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1^{aad}

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Ahmed Hassan Osman** loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodobka 2^{aad}

Waxaa **Dr. Ahmed Hassan Osman** uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3^{aad}

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.



Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud



Address: Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu, Somalia



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR.478

TAARIKH: 03-DA LUULIYO, 2025

MAGACAABIS LA-TALIYE SARE EE MADAXWEYNAHA J.F.S EE ARRIMAHA
WADAMADA ISLAAMKA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87^{aad} iyo 90^{aad} ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Mudanaha
loo magacaabay xilkan.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista La-Taliye Sare
ee Madaxweynaha ee Arrimaha Wadamada Islaamka.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1^{aad}

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu u magacaabay
C/Qaadir Sh. Xannafi Sh. Bashiir, in uu noqdo La-Taliye Sare ee Madaxweynaha J.F.S
ee Arrimaha Wadamada Islaamka.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda
Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.



Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S





FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR.479

TAARIKH: 03-DA LUULIYO, 2025

MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWEYNAHA J.F.S EE ARRIMAHA
WADAMADA CARABTA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87^{aad} iyo 90^{aad} ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Mudanaha
loo magacaabay xilkan.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista La-Taliye
Madaxweyne ee Arrimaha Wadamada Carabta.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1^{aad}


Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu u magacaabay
Cali Maxamed Xalane, in uu noqdo La-Taliyaha Madaxweynaha J.F.S ee Arrimaha
Wadamada Carabta.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda
Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.



Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S





XEER MADAXWEYNE LR.480

TAARIKH: 20-KA LUULIYO, 2025

MAGACAABIS GUDDOOMIYAHA XARUNTA ISKU-DUWIDDA IYO
HAWLGALLADA WADAJIRKA AH

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87^{aad} iyo 90^{aad} ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Mudanaha
loo magacaabay xilkan.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista Guddoomiyaha Xarunta
Isku-Duwidda iyo Hawlgallada Wadajirka ah.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1^{aad}

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu u magacaabay
Gen.Maxamed Cali Bariise, in uu noqdo Guddoomiyaha Xarunta Isku-Duwidda iyo
Hawlgallada Wadajirka ah.

Qodobka 2^{aad}

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda
Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.



Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J.F.S





FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR.616

TAARIKH: 13-TA DISEEMBAR 2025

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad}, Farqadda 1^{aad}, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2^{aad} ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay 02/03/1962, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay WC&AD/XW/2719/2025, ku taariikheysan 09/08/2025, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay Dr. Mahad Mohamed Abukar.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1^{aad}

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa Dr. Mahad Mohamed Abukar, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodobka 2^{aad}

Waxaa Dr. Mahad Mohamed Abukar, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3^{aad}

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.



Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR.617

TAARIIKH: 13-TA DISEEMBAR 2025

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad}, Farqadda 1^{aad}, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2^{aad} ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay 02/03/1962, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay WC&AD/XW/2677/11/2025, ku taariikheysan 11/11/2025, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay Dr. Caamir Axmed Maxamed.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1^{aad}

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa Dr. Caamir Axmed Maxamed, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodobka 2^{aad}

Waxaa Dr. Caamir Axmed Maxamed, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3^{aad}

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.



Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.



FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR.628

TAARIIKH: 27-DA DISEEMBAR 2025

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87^{aad}, Farqadda 1^{aad}, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2^{aad} ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1, ee soo baxay 02/03/1962, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7, ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuur-ka, warqadda sumaddeedu tahay WC&AD/XW/2530/2025, ku taariikheysan 01/11/2025, kuna saabsan soo jeedin Oggolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay Dr. Mohamed Salad Hassan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1^{aad}

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa Dr. Mohamed Salad Hassan, loo magacaabay in uu furto Nootaayo.

Qodobka 2^{aad}

Waxaa Dr. Mohamed Salad Hassan, uu ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3^{aad}

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.



Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud
Madaxweynaha J. F.S.

Address: Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu, Somalia

Tel: +252 1 861000 / 261000 | Email: contact@presidency.gov.so | Web: www.villasomalia.gov.so